

Dhisida bulsho horumarsan iyo dhaqankii rasuulka
DHISIDA
BULSHO
HORUMARSAN
IYO
DHAQANKII
RASUULKA
Bulsho mideysan
Akhlaaq suuban
Caddaalad & Naxariis
Horumar & Barwaaqo
Turjume
muxamed
cawil yuusuf

## Tusmada Buuga

Horudhac ________________________________________04

Gogol xaar _________________________________________06

Dib u heshiisiintii Reer Madiina ______________________09

Heshiisiintii Ansaarta ______________________________11

Walaalayntii Muhaajiriinta iyo Ansaarta _______________12

Hormarintii Magaalada Madiina iyo Bulshadeda __________13

Wanqalkii Magaca Al-madiina Al- munawara___________14

Jeclantii Nebiga ee Magaalada Madiina______________16

Dhismihii Masaajidka Nebiga ______________________18

Kaalinta Masjidka ee dhisamaha Bulshada Muslimka____19

Kobcintii Tirada iyo Tayada dadka Reer Madiina_______20

Hormarintii Waxbarashada Madiina___________________24

Kacdoonkii Akhriska iyo Qoraalka ee Madiina___________26

Hormarintii Caafimaadka ee Madiina___________________29

Hormarintii Dhaqaalaha ee Madiina____________________33

Ganacsigii Magaalada Madiina__________________________35

Dhismihii Dowladii Islaamka__________________________38

Cadaalada iyo Sinaanta______________________________42

Hagaajintii Nabadda Madiina________________________49
Isbadalkii Dhaqanka Bulsho ee Madiina________________56
Akhlaaqda Islaamka______________________________64
Is-caawinta____________________________________65
Isku Samrida Bulshada____________________________67
Sinaanta iyo Cadaalada___________________________68
Kibirka iyo Isla-weynanka_________________________69
Isku nasteexaynta _______________________________70
Daacadnimada__________________________________74
Run sheegida___________________________________76
Xishoodka_____________________________________80
Amaanada_____________________________________85
Oofinta Balamaha________________________________96
Gunaanad iyo Gabagabo__________________________101

# HORDHAC

وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا رَحْمَةً لِلْعَالَمِينَ ( الأنبياء 107 )

{Waxaan kuu soo dirnay inaad naxariis u noqoto dhammaan Caalamka}

Nabigeena waxaa Illahay la soo diray raxmad iyo naxariis uu u sido dhammaan adduun weynahaan naxariistaas keliya ma ahan mida aakhiro oo janada ah laakiin waa isku jirka naxariista adduunka iyo tan aakhiro. Naxriista aakhiro waa janada waxaana helaya dadkii raacay oo rumeeyay Rasuulka suuban (NNKH).Haddaba naxariista adduunku maxay tahay? Yaana helaya?

Naxariista addunka ee Nabigeena lala soo diray waa nolol degan oo fudud, oo ammaan ah raaxana leh taas oo qofku ku dareemayo barwaaqo iyo xasilooni gudihiisa iyo dibadiisaba. Sidaas darted Nebbigeenu wuxuu ku dedaalay inuu ka dhigo nolosha adduunka mid naxariis leh oo barwaaqo ah, mana la heli karo noloshaas naxariista leh ee barwaaqada ah ilaa laga yagleelo bulsho uqalanta noloshaas oo ka dhisan dhammaan tiirarka aasaaska u ah nolol degan oo barwaaqo ah.

Markaa ayuu nebigeenu (NNKH) awooda saaray sidii uu uga dhigi lahaa dhammaan ummadiisa gaar ahaan dadkii uu la noolaa kuwo ku habbon oo haysta nolol barwaaqo ah, wuxuuna ka

dhisay dhammaan tiirarka loogu baahan yahay noloshaas oo kala ah:

- Heshiis iyo wada noolaansho
- Cibaado iyo Alle ka cabsi
- Kobcinta tirada bulsho ama dadeed
- Dal jacayl iyo wadaniyad
- Hormarinta waxbarashada iyo xirfadaha
- Hormarinta caafimaadka
- Hormarinta dhaqaalaha iyo ganacsiga
- Hirgalinta nidaam dowli ah oo ku dhisan naxariis, cadaalad, iyo sareynta sharciga
- Taabagelinta xeerar amni oo la isku halayn karo
- Iyo ugu dambeyn dhisida akhlaaqda bulshada iyo qiyamkooda, si cajiib ah oo aan horay iyo gadaal toona loo arag.

Nasiib daro dadka muslimiinta ah maanta intooda badan oo ay ka mid yihiin inaga oo Soomaali ah ma haystaan nolosha noocaas ah iyo wax udhow toona, xitaa cilmiga nebawiga ah ee dhisida bulshooyinka ka hadlaya ayaa inaga maqan amase aanaan fahamsanayn.

Muslimiinta qaar baa waxayba aaminsan yihiin in nolosha hagaagsan ee adduunka iyo aqoonteedaba loogu tala galay Gaalada keliya. Waxaa ka sii daran kuwa u haysta Nebi Muxamed(NNKH) iyo diintii uu xambaarsanaa inay ku kooban

tahay dhanka cibaadada keliya oo aysan waxba ka gelin hormarka bulshada taasna waa been iyo xitaa beenin la beeniyo diinta Islaamka iyo nebigeedaba. Waxaan ka ogaan doonaa xaqiiqada iyo nuxurka uu xambaarsanaa nebigeenu (NNKH) bogaga soo socda ee buuga magaciisu yahay **Dhismaha Bulsho Hagaagsan iyo Dhaqanka Rasuulka** oo turjimaad u ah buuga carabiga ah ee la yiraahdo بناء المجتمع المدني وتنميته في السيرة النبوية oo uu qoray **Dr C/casiis Ibraahim Al Cumari.**

## Gogol xaar

**Bulsho:** Waa ummad ku midaysan dal iyo dan inta badana uu ka dhexeeyo hal maamul.

Sida la wada ogyahay bini-aadamku dabeecad ahaan ayuu bulshaawi u yahay, kamana maarmo dadkiisa iyo dalkiisa, saa soo ay tahay dadka qaarkood waxay awooda saaraan danta ayaga u gaarka ah, kamana fekeraan dan bulsho leedahay. Malahayga Soomaaliduna saas ayay u badan tahay. Qaar kalena waxay aad ugu dedaalaan in ay wax u taraan dadkooda iyo bulshada ay la nool yihiin. Nebigeenu (NNKH) wuxuu ka mid ahaa hogaana u ahaa kooxda dambe. Markii la soo dirayba wuxuu awooda saaray sidii uu bulshada wax uga badeli lahaa dhanka cibaadada, Alle ku

xirnaanshaha iyo ka fogeynta dadka cibaadadii sanamyada. Sidoo kale dhanka nolosha adduunka oo ay ugu horeyso helida nidaam dowli ah oo bulshada ku dhaqa cadaalad, naxariis, iyo sareynta sharciga, ilaaliyana xuquuqda Illaahay iyo xuquuqda dhammaan adoomaha Illaahay. Nidaamkaas oo ku qotoma dhawrida shanta(5) lagama maarmaanka ah الضروريات الخمس oo kala ah: Diinta, Nafta, Maalka, Caqliga, iyo Nasabka ama (Abtiriska).

Markii koowaad nebiga (NNKH) waxaa lagu soo diray magaalada **Maka Al mukarama** oo uu ku noolaa ayna degan yihiin qabiilka la yiraahdo **Qureysh**(Qabiilkii nebiga), waxayna diideen oo ka madax adaygeen inay u hogaansamaan fariimihii Illaahay ee nebigu(NNKH)siday, waxaynaba ka la horyimaadeen dagaal iyo ciqaab ay kula kaceen nebiga(NNKH) iyo intii rumeysayba. Halgan dheer oo toban sano(10) qaatay kadib wuxuu ku qancay nebi Muxamed (NNKH) inuu baadi goobo goob kale iyo dad kale oo uu ku dhex fidiyo hoyna u noqda diintaan **Islaamka** ee xambaarsan naxariista caalamiga ah. Markaas ayuu bilaabay nebigu inuu la kulmo qabaa' ilkii carbeed ee kale isagoo kala hadlaya inay siiyaan saldhig uu ka hogaamiyo diinta **Islaamka**.

Waxaa soo dhaweeyay oo aqbalay codsigii ergayga Illahay(NNKH) labo qabiil oo Carab ah oo la kala yiraahdo: **Aws** iyo **Khasraj**, oo wada dega magaalo lagu magacaabo **Yathriba (يثرب)** oo ku taala waqooyiga **Maka** una jirta **410 km.** Markii koowaad waxay kula balameen Rasuulka (NNKH) in ay soo diyaar garoobayaan una soo dad badsanayaan Rasuulkuna uu soo

diyaar garoobo, laysuna soo noqdo sanadka dambe ee Xajka si ay uga gaaraan heshiis kama dambeys ah codsigaan muhiimka ah. Sandkii dambe markii laysku soo noqday waxaa la gaaray heshiis balaaran oo ku galay taariikhda Islaamka magaca heshiiskii **Al-Caqba ee labaad ( بيعة العقبة الثانية )** ,

waxaana ku matelay dhinaca nebiga (NNKH) isaga oo ah nebi Muxamed (NNKH) iyo adeerkiis Cabaas Binu Cabdi mudalib, dhanka reer **Yathribna** waxaa ku matelay 75 qof, 73 nin iyo 2 gabdhood, waxaana lagu heshiiyay shan (5) qodob oo kala ah:

1. Ismaqal, dhaga nugeyl, iyo kala dambeyn xilli kasta ah, xitaa markii xaalku culus yahay.
2. In dhaqaale lagu bixiyo diinta Illahay oo la maal gashado
3. In lays faro wanaaga xumaantana la iska reebo
4. In xaqa loo hiiliyo oo aan cidna looga gaban
5. In ay difaacayaan nebiga sida ay u difaacaan naftooda, ilmahooda iyo haweenkooda, markii uu usoo haajiro.

Rasuulkuna wuxuu u balan qaaday haday kasoo baxaan heshiiskaan in ay galayaan **Janada** Illaahay. Intaas wixii ka dambeeyay Rasuulku wuxuu usoo wareegay magaalada **Yathriba** oo uu u bixiyay magaca **Al Madiina Al munawara.** Waxaa sidoo kale usoo wareegay magaalada Madiina inta badan dadkii rumeeyay xilligii uu joogey magaalada **Maka,** oo tiradoodu kor u dhaafeysay 83 nin iyo 19 dumar ah, kuwaas oo taariikhda ku galay magaca **AL muhaajiriin (المهاجرين)** qoxootigii diinta.

Waana halkaan meesha Rasuulku ka hirgeliyay diinta **Islaamka** oo dhameystiran kagana dhabeeyay naxariistii uu Illaahay ku tilmaamay in uu u yahay nebigu caalamka oo dhan, naxariistaas oo ku fasiran mida **Janada** iyo tan adduunka oo ah nolol degan oo barwaaqo ah. Waana halkaan meesha uu ka soo saaray nebigu (NNKH) jiil ka diyaarsan dhan kasta una diyaar ah inay maamulaam dhammaan daafaha caalamka. Rasuulku wuxuu ku dhiirigelin jiray asxaabtiisa uguna bishaarayn jiray in ay furandoonaan mamulina doonaan dhulka quwadaha waaweyn ee xilligaas jiray, sida awoodihii **Furus** iyo **Roomaanka,** waxayna u dhacday si dhab ah, sidaa uu sheegay nebigu (NNKH).

عن جابر بن سَمُرَةَ قال: سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول: " لَتَفْتَحَنَّ عِصَابَةٌ مِنَ المُسْلِمِينَ -أَوْ مِنَ المُؤْمِنِينَ- كَنْزَ آلِ كِسْرَى الَّذِي فِي الأَبْيَضِ ".

“Waxay furan doonaan koox ka mid ah muslimiinta kaydadka madaxda reer **Faaris** ee **Ilma Kisra**.”

## Dib u heshiisiintii Reer Madiina

Markii Rasuulku yimid magaalada Madiina wuxuu bilaabay inuu dhiso bulsho ay ku dheehan tahay dadnimo, cadaalad iyo ilaalinta xuquuqda bini aadamka iyo sharaftiisa, wuxuuna la yimid diinta Islaamka oo uusan Illahay ka yeelayn bini aadamka diin kale, sida Illahay ku sheegay Qur’aanka kariimka ah.

﴿ وَمَن يَبْتَغِ غَيْرَ الْإِسْلَامِ دِينًا فَلَن يُقْبَلَ مِنْهُ وَهُوَ فِي الْآخِرَةِ مِنَ الْخَاسِرِينَ﴾ سورة آل عمران: 85

Saa soo ay tahay qofna laguma khasbayn inuu soo galo diinta islaamka, sida uu Allah ku sheegay kitaabkiisa Qur'aanka ah:

﴿ لَا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ ۖ قَد تَّبَيَّنَ الرُّشْدُ مِنَ الْغَيِّ ۚ فَمَن يَكْفُرْ بِالطَّاغُوتِ وَيُؤْمِن بِاللَّهِ فَقَدِ اسْتَمْسَكَ بِالْعُرْوَةِ الْوُثْقَىٰ لَا انفِصَامَ لَهَا ۗ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ﴾ البقرة: 256

Dadku xor ayay u ahaayeen diintooda markii dacwadu gaarto kadib.

Markuu Rasuulku yimid Madiina wuxuu ku dedaalay in ay is fahmaan oo ay wada noolaadaan dhammaan dadka degan magaaladan, wuxuuna la galay heshiisyo wada noolaansho, Yuhuudii degenayd magaalada Madiina, si dadku u helaan nolol degan oo amaan ah, oo la wada ilaashado. Qodobadii ugu muhiimsanaa heshiiskaas waxaa ka mid ahaa in laga wada difaacdo magaalada Madiina wixii cadow ah ee dibada ka yimaada, waxaa kaloo ka mid ahaa: in dadka magalada wada degan is nabad geliyaan kuna wada noolaadaan nabad, iyo deris wanaag.

Heshiiska noocaas ah wuxuu tusaale cad u yahay hufnaanta iyo cadaalada nidaamka Islaamiga ah ee uu nebigu hogaanka u hayay kaas oo aysan manta gaarsiisnayn xitaa dawladaha casriga ah ee sheegta xoriyad iyo amni iyo sinaan in ay dadkooda ku maamulaan. Heshiiskaani wuxuu bar bilow u ahaa dowladii

nebigu (NNKH) ka yagleelay magalada Madiina ee ku dhisnayd dhaqan gelinta shareecada Islaamka.

Waxyaabaha la yaabka leh waxaa ka mid ah: dadka Soomaalida ah ee sheegta in ay 100% Islaam yihiin, haddana wada noolaan la' oo u kala xirxiran reero dhammaantood Islaamnimo sheeganaya haddana wada col ah. Nebiga ay leeyihiin diintiisa ayaan haysanaa wuxuu dedaal walba ku bixinayaa in uu la heshiiyo lana noolaado dad Yahuud ah oo ah gaalada kuwa ugu xun uguna khiyaanada badan adduunka oo dhan. Waa kaaf iyo kala dheeri iyo ku aan is qaban Karin waana ka aradnaanta akhlaaqda nebiga(NNKH) iyo fahamka diinteena suuban.

## Heshiisiintii Ansaarta

Sidoo kale wuxuu ku guuleystay Rasuulku inuu heshiis dhex dhigo labadii qabiil ee kusoo dhaweeyay magaalada Madiina oo kala ahaa **AL Aws Iyo Khasraj.** Wuxuuna u wada bixiyay hal magac o ah **AL Ansaar.** Labadaas qabiil oo dagaalamayay mudo ka badan **120** sano, iskana dilay dad tiradoodu kor u dhaafeyso **1000** qof ka hor Islaamka. Markii ay Islaameen ba waxay noqdeen dad walaalo ah, ul iyo diirkeed ah oo wax wada qabsada isuna hura nafta iyo maalka, kuna mideysan magaca **U hiiliyaasha Diinta Islaamka (الأنصار),** kana wada mid ah dowladii uu aasaasay Rasuulka suuban (NNKH), waxa sidaas deg-dega ah ubadelayna wax kale maahee waa caqiidada Islaamka ee ku dhisan walaaltinimo, wada noolaansho ka sareysa

xigaalka qabiilka u diiristiisa iyo u aargudashadiisa, haddaba waxaa is weydiin  mudan inaga oo Soomaali ah ma haysano miyaa diintaas, caqiidadaas saas ula diriraysa qabyaalada iyo kala qaybsanaanta , sidaas deg-dega ahna ku bedeshay caqiidadii Carbta ee qabyaaladu salka u ahayd, mise waan ka been sheegaynaa?

## Walaalayntii Muhaajiriinta iyo Ansaarta

Walaalayntii Muhaajiriinta iyo Ansaarta waxay ahayd nidaamka ugu layaabka badan ee is dhex gal iyo wax wada qabsi bulsho oo soo mara taariikhda Bini-Aadamka kaas oo uu sameeyay nebi Muxamed (NNKH) ka dib hijradii Madiina, hirgelintiisuna waxay salka u dhigtay midnimadii bulshada magaalada Madiina dhammaantood, soo-galootigooda iyo sii joogeheedaba.  sidoo kale  wuxuu nidaamkaan meesha ka saaray xag-jirnimadii qabiil ee Islaamka kahor jirtay, wuxuuna la diriray kala sareyntii ku dhisnayd isirka iyo hantiga, maadaama ay isku milmeen oo ay wadaageen soo-galootigii iyo qofkii deegaanka deganaa hoy, hanti, iyo xitaa is dhaxlid bilowgii hore ee Islaamka. Waxaa kale oo uu si cajiib ah u maareeyay nidaamkaan tageera nafsi iyo mid maadi ah ee loo fidiyo dadkii soo qaxay ee ka soo tegay wax alaale iyo wixii ay haysteen. **Ansaari** waxay sameeyeen wax fajac ku abuura aqoon yahanka taariikhda iyo cilmiga bulshada

lafagura kadib markii ay si buuxda ula qaybsadeen walaalahooda muhaajiriinta ah wixii xoolo iyo xilo ay haysteen. Mid kamid ah tusaale yaasha ugu caansan waa kan dhex maray **C/raxmaan Binu Cawf** oo muuhaajir ah iyo **Sacad Binu Al-Rabiic** oo Ansaari ah, wuxuun Sacad usoo bandhigay walaalkiis C/raxmaan inuu qaato kala bar hantidiisa, labadiisa xaasna uu mid u furo, ka dibna isagu uu guursado, cudad baxa ka dib, C/raxmaan se waa u mahad celiyay walaalkiis wuuna u duceeyay wuxuuna ka codsaday inuu tuso oo uu kala baro suuqa ganacsiga kana caawiyo inuu helo shaqo. Sacad wuu sameeyay codsigii walaalkiis, wuxuuna la helay shaqo, markaa kadib C/raxmaan wuxuu ka mid noqday hatiileyaasha magaalada Madiina ugu waaweyn.

Hawshaas baaxada leh ee dib u heshiisiineed ee uu qabtay nebigu (NNKH) ka dib waxaa fariistay oo hagaagay dhaqankii bulshada magaalada Madiina Al- munawara, waxaana soo baxay bulsho isku wada duuban oo dhinac u wada jeeda, una diyaar ah hormar iyo wax wada qabsi, markaas ayuu nebigu (NNKH) ugudbay qaybihii kale ee hormarinta bulshada.

## Hormarintii Magaalada Madiina iyo Bulshadeeda

Islaamku wuxuu u yimid sidiisaba inuu hormariyo bulshooyinka oo uu jeclaysiiyo Cibaadada Illaahay sarena u qaado nidaamkooda dowladeed, sidoo kale uu kobciyo wax soo

saarkooda, kana ilaaliyo deegaankooda iyo dhulkooda wax kasta oo wax u dhimaya. Waxaa tusaale noogu filan magaalada Madiina iyo sida uu uga horumariyay nebi Muxamed (NNKH) dhammaan waxa ay u bulshadeedu ubaahnayd, kana dhigay bulshada magaalada Madiina kuwo ku tartama wax soo saarka iyo wax bixinta halkii ay ka ahaan la haayeen kuwo ka suga dadka kale inay wax usoo saaraan ama ay caawiyaan kuna noolaadaan deeqo shisheeye ayagoo gardaduub u xiran oo gacmohooda aan fidinaynin kuna mar marsoonaya wadanku shaqo malaha, iyo balaayaa habsatay wadankaan iyo erayo la mid ah oo taban waxna aan u tarayn naftooda iyo dalkooda. Sidaas ayay Madiina ku noqotay magaalo cusub oo horumarsan kana badelan 100% Yathribadii ay ahayd intii uusan imaan nebi Muxamed (NNKH).

## Wanqalkii Magaca Al-Madiina Al-Munawara

Magaalada Madiina waxaa la oran jiray Islaamka ka hor magaca **Yathriba** oo macnihiisu yahay magaaladii **Baas** ama magaaladii **Eeda**. Rasuulku wuxuu nacay magacaan xun wuxuuna ku bedelay magaca Al Madiina oo macnihiisu yahay magaaladii **Ilbaxnimada iyo horumarka.** Magaca Yathriba Qur'aanka wuxuu kusoo arooray **hal mar.**

﴿ وَإِذْ قَالَت طَّائِفَةٌ مِّنْهُمْ يَا أَهْلَ يَثْرِبَ لَا مُقَامَ لَكُمْ فَارْجِعُوا ۚ وَيَسْتَأْذِنُ فَرِيقٌ مِّنْهُمُ النَّبِيَّ يَقُولُونَ إِنَّ بُيُوتَنَا عَوْرَةٌ وَمَا هِيَ بِعَوْرَةٍ ۖ إِن يُرِيدُونَ إِلَّا فِرَارًا﴾ الأحزاب: 13

Halka magaca Madiina uu quraanka kusoo arooray afar jeer (4)

(وَمِمَّنْ حَوْلَكُمْ مِنَ الْأَعْرَابِ مُنَافِقُونَ وَمِنْ أَهْلِ الْمَدِينَةِ مَرَدُوا عَلَى النِّفَاقِ ) التوبة 101

﴿ مَا كَانَ لِأَهْلِ الْمَدِينَةِ وَمَنْ حَوْلَهُم مِّنَ الْأَعْرَابِ أَن يَتَخَلَّفُوا عَن رَّسُولِ اللَّهِ وَلَا يَرْغَبُوا بِأَنفُسِهِمْ عَن نَّفْسِهِ ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ لَا يُصِيبُهُمْ ظَمَأٌ وَلَا نَصَبٌ وَلَا مَخْمَصَةٌ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَلَا يَطَئُونَ مَوْطِئًا يَغِيظُ الْكُفَّارَ وَلَا يَنَالُونَ مِنْ عَدُوٍّ نَّيْلًا إِلَّا كُتِبَ لَهُم بِهِ عَمَلٌ صَالِحٌ ۚ إِنَّ اللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُحْسِنِينَ﴾ التوبة: 120

۞ لَّئِن لَّمْ يَنتَهِ الْمُنَافِقُونَ وَالَّذِينَ فِي قُلُوبِهِم مَّرَضٌ وَالْمُرْجِفُونَ فِي الْمَدِينَةِ لَنُغْرِيَنَّكَ بِهِمْ ثُمَّ لَا يُجَاوِرُونَكَ فِيهَا إِلَّا قَلِيلًا﴾ الأحزاب: 60

﴿ يَقُولُونَ لَئِن رَّجَعْنَا إِلَى الْمَدِينَةِ لَيُخْرِجَنَّ الْأَعَزُّ مِنْهَا الْأَذَلَّ ۚ وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَٰكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ﴾ سورة المنافقون:08

Sidoo kale nebigu (NNKH) wuxuu u bixiyay magalada Madiina magacyo kale oo wada qurux badan sida; **Udgoon, Gurigii Islaamka,** iyo **Magaaladii Sugnaanta.**

## Jeclaantii Nebiga ee Madiina

Nebigu (NNKH) wuxuu aad u jeclaa magaalada **Madiina** wuxuuna ka dhigay meel ka caagan wax kasta oo xun (**الحرم** ) sida magaalada Maka oo kale, sida uu ku sheegay Rasuulku xadiis kii bukhaari weriyay:

"إنَّ إبراهيمَ حَرَّمَ مَكَّةَ ودَعا لأهلِها، وإنِّي حَرَّمتُ المَدينةَ كما حَرَّمَ إبراهيمُ مَكَّةَ، وإنِّي دَعَوتُ في صاعِها ومُدِّها بمِثلَي ما دَعا به إبراهيمُ لأهلِ مَكَّةَ "

**{ Nebi Ibraahiim (CS) wuxuu xaram ka dhigay una duceeyay magaalada Maka aniguna waxaan xaram ka dhigay una duceeyay magaalada Madiina }**

Waxaan shaki ku jirin qofku meesha uu jecel yahay in uu ilaalinayo oo difaacayo, daryeelayana, waana mida manta ka maqan inta badan hogaanka Soomaalida iyo xitaa bulsho weynta Soomaaliyeed inay jeclaadaan wadankooda kuna qancaan joogistiisa kana shaqeeyaan hormarkiisa, iyagoo kaga dayanaya nebigooda suuban (NNKH). Wxuu soo saaray nebi Muxamed xeerar lagu ilaalinayo deegaanka magaalada Madiina sida uu ku sheegay Rasuulku xadiis kaan:

عن علي -رضي الله تعالى عنه- مرفوعاً في المدينة: "لا يُختلى خلاها، ولا يُنفر صيدُها, ولا يلتقط لقطتها إلا من أنشدها, ولا يصلح لرجل أن يحمل فيها السلاح لقتال، ولا يصلح أن يقطع فيها شجراً إلا أن يعلفَ رجلٌ بعيره" رواه أحمد

**{Lama goyn karo daaqa magaalada Madiina, lamana eryan karo ugaarteeda, lamana qaadan karo baadideeda ilaa qof**

**yaboohinaya maahane, lagumana dhex qaadan karo magaalada Madiina wax hub ah, lamana jari karo geedeheeda, ilaa baahi weyn in loo qabo mooyee}**

Xeerarkaani waxa ay qayb lixaad leh ka qaateen ilaalinta deegaanka magaalada Madiina, waxaana soo jiidasho leh qaabka Rasuulku 1440 sano ka hor u ilaaliyay deegaanka, haday tahay duur-joog, dhul iyo dhir ba. Waxaa sidoo kale cajab leh qodobka oranaya hub laguma qadan karo magaalada Madiina gudaheeda.

Inagu haddaan Soomaali nahay halkee ka joognaa ilaalinta deegaanka, dhul, dhir iyo duur-joogba? Sidoo kale ma tixgelino qodobka oranaya magaalada yaan hub lagu dhex qaadan, waxaa aad muhiim u ah oo lagama maar maan ah in la joojiyo, lagana hortago xaalufinta deegaanka, inagoo kaga dayanayna nebigeena suuban (NNKH) ilaalinta deegaanka iyo badqabka amniga magaalooyinka. Rasuulku wuxuu markasta amaani jiray magaalada Madiina iyo dadka degan, waxaana kamid ahaa hadaladii uu ku amaanay Madiina:

"إِنَّ الإِيمَانَ لَيَأْرِزُ إِلَى المَدِينَةِ، كَمَا تَأْرِزُ الحَيَّةُ إِلَى جُحْرِها"

**{Iimaanku wuxuu usoo hoydaa magaalada Madiina sida abeesadu ugu hoyato godkeeda}**

Waxaa kale oo soo arooray axaadiis fara badan oo nebigu ugu duceeyay magaalada Madiina, waxaana ka mid ah xadiisakaan:

"اللَّهُمَّ حَبِّبْ إِلَيْنَا المَدِينَةَ كَحُبِّنَا مَكَّةَ أَوْ أَشَدَّ، اللَّهُمَّ بَارِكْ لَنَا فِي صَاعِنَا وَفِي مُدِّنَا، وَصَحِّحْهَا لَنَا، وَانْقُلْ حُمَّاهَا إِلَى الجُحْفَةِ"

**{Illaahow Madiina na jeclaysii sidaad maka noo jeclaysiisay ama ka badan, Illaahow noo barakee Madiina koombadeeda iyo saaceeda, noogana dhig magaalo caafimaad, cudurkeedana u rar meesha Juxfa la dhaho}**

Isugeynta axaadiistaan waxay ina barayaan inaan wadakeena jeclaano una ducayno halkii aan ka haaraami lahayn ama habaari lahayn. Nebiga waxaa laga sheegay inuu yiri:

"حب الوطن من الإيمان"

**{Wadanka oo la jeclaado wuxuu ka mid yahay iimaanka}**

## Dhismihii Masaajidka Nebiga

Shaqooyinkii ugu horeeyay ee uu Rasuulku qabtay markii uu yimid magaalada Madiina waxaa ka mid ahaa inuu asteeyay goobta loo diyaarinayo in ay noqoto masaajidka magaalada Madiina, waana halkii ay fariisatay hashii uu ku yimid nebigu magaalada Madiina. Markaas waxay noqonaysaa buqcad uu Illaahay u dooray inay noqoto masaajidka magaalada, waxaana horay ugu tuk-tukan jiray dad kamid ah muslimiinta, waxayna ahayd meel timitrta lagu qalajiyo oo ay leeyihiin labo wiil oo agoon ah oo la kala yiraahdo **Sahal** iyo **Suhayl.** Waxaana masuul

u ahaa oday ka mid ah odeyaasha Madiina laguna magacaabo **Ascad Binu Zuraarata.**

Markii hashu fariisatay ayuu Rasuulku yiri “Idanka Illahay halkaan ayaa deegaan inoo noqondoonta” wuxuuna u cid diray labadii wiil, kana codsaday in ay ka iibiyaan booskaan, waxay se dheheen “Waxaan siinay Rasuulka Illaahay”, Rasuulku se waa diiday inuu ka aqbalo maadaama ay agoon ahaayeen. Ugu dambayn nebigu (NNKH) wuu ka iibiyay labadii wiil booskii wuxuuna ka dhisay **Masaajidka barakaysan ee nebiga** ee ilaa manta dhisan, waqafkiisana waxaa iska leh nebi Muxamed (NNKH).

## Kaalinta Masajidka ee Dhismaha Bulshada Muslimka ah

Masaajidku waa dhagaxa ugu horeeya marka la dhisayo bulsho muslima ah, maxaa yeelay wuxuu masaajidku qaabaynayaa bulsho is haysata Allahoodna ku caabuda midnimo, waana dugsi soo saara jiil ku rabeysan cibaado, midnimo, iyo is caawin. Masajidku wuxuu qofka muslimka ah ka dhisayaa mabaa di’da islaamiga ah, wuxuuna kor uqaadayaa akhlaaqdiisa isagoo adeegsanaya salaadaha, wacdiga iyo duruusta diiniga ah. Sidoo kale wuxuu masaajidku xoojiyaa midnimada, walaaltinimada, bulshada dhexdooda ah iyo sinaantoodaba, maxaa yeelay waxay ku kulmaan hal goob ah iyagoo wada galaya hal saf ah,

una wada jeeda hal jiho, una wada tukanaya hal qaab wax kala duwanaansha ahna aysan ka muuqan.

Misaajidku wuxuu qayb lixaad leh  ka qaataa isku tiirsanaanta bulsho, ka warqabka kooda jilicsan iyo caawintiisaba, waxaana lagu bixiyaa inta badan sekada, sadaqada iyo wax kasta oo sama fal ah.

Intaas oo dhan waxaa dheer in masaajidku yahay goob aflax ee bulshada ugu badan ee muslimiinta ah ay kasoo durduurtaan culuumta kala duwan ee bulshadu baahida u qabto sida: Qur’aanka, Xadiiska nebiga, Fiqiga Islaamak iyo dhammaan culuumta bini aadamku u baahan yahay.

## Kobcintii Tirada iyo Tayada Dadkii Reer Madiina

Badashada tirada bulsho ee dal ama deegaan waa awood wax soo saar, dhaqaale, iyo cudud. Haddii si sax ah loo maareeyo mana aha sabab fakhri ama fasaad deegaaneed sida ay ku doodaan reer galbeedka qaarkood. Sidaas darted nebi Muxamed (Csw) wuxuu aad ugu dedaalay inay korarto tirada dadka degan magaalada Madiina dhanka dhalashada carruurta iyo imaanshaha magaalada, wuxuuna aad ugu farxi jirey markuu qof ku dhasho magaalada Madiina gudaheeda. Wuxuuna ammaanay nebigu (NNKH) guurka gaar ahaan gabdhaha dhalmada badan in la guursado, sida uu ku sheegay nebigu xadiiskaan:

" تزوجوا الودود الولود فإني مكاثر بكم الأمم  يوم القيامة" رواه احمد

**{Guursada gabdhaha raga jecel oo dhalmada badan, maxaa yeelay waxaan idinku badsanayaa ummadayda maalinta qiyaame}.**

Waxaa cajiib ah manta dowladihii diidi jirey dhalashada carruurta badan ayaa dadkooda ku dhiirigelinaya dhalmada iyo badashada bulsho ayagoo ku bixinaya dhaqaale badan.

Qur'aanku wuxuu ina barayaa in aan ilaalino ilmaha uurka haku jiro ama ha dhasho sida uu Allaah (SW) ku sheegay kitaabkiisa:

"وَلَا تَقْتُلُوا أَوْلَادَكُمْ مِنْ إِمْلَاقٍ نَحْنُ نَرْزُقُكُمْ وَإِيَّاهُمْ" [الأنعام: 151

**{Ha u dilinina ilmihiina ka baqida faqriga, anaga ayaa biilayna idinka iyo iyagaba}**

Tirakoobkii ugu horeeyay ee Islaamka dhexdiisa ka dhaca wuxuu ahaa xilligii nebi Muxamed (NNKH) sida lagu sheegay xadiiskaan:

"قال النَّبيُّ صلَّى اللهُ عليه وسلَّم: اكتُبوا لي مَن تَلَفَّظَ بالإسلامِ مِنَ النَّاسِ، فكَتَبنا له ألفًا وخَمسَ مِئةِ رَجُلٍ"

**{Ii soo qora cid kasta oo ku dhawaaqday Islaamnimada, waxaana loo soo qoray 1500 oo qof oo islaam ah}.**

Waxaa kale oo Rasuulku ku dedaalayay in magaalada Madiina la yimaado oo loo soo haajiro. Wuxuuna dhiirigeliyay imaanshaheeda iyo joogideedaba sida uu Abuu Hureyra Rasuulka ka wariyay:

"عن أبي هريرة رضي الله عنه، أن رسول الله ﷺ قال: «لا يصبر على لأواء المدينة وشدتها أحد من أمتي، إلا كنت له شفيعاً يوم القيامة أو شهيداً"

**{Qofkii u adkeysta joogista magaalada Madiina waxaan u noqonayaa mid u ergeeya ama u markhaati kaca maalinta qiyaame}.**

Sidaas oo ay tahay nebigu kama saarin faraha degida iyo deegaamaysiga magaalada Madiina ee wuxuu u sameeyay xeerar lagu dhaqo deegaanka. Waxaad arkaysaa mar-marka qaar isagoo u diidaya qabaa'ilka qaarkood inay usoo wareegaan gudaha Magaalada madiina markay codsadeen kuna amraya inay joogaan deegaankooda sida reer **Banii Salama** oo kale hadba sida maslaxadu ugu jirto dadka iyo deegaanka.

Kobcinta dadka Madiina ma ahayn kaliya tirada dadka ee waxaa garab socday kobcinta dadnimada iyo kartida bulsho, wuxuuna ku dedaalayay nebigu (NNKH) in qof kasta oo muslim ah uu qaato kaalinta uga aadan bulshadiisa hagar la'aan iyo hangaabni la'aan. Wuxuuna dhisay nebigu (CSW) kalsoonida nafeed ee qofka muslimka ah uu ku qabo naftiisa, isagoo ka bilaabaya nebigu (CSW) ugu yeerida qof kasta magaca ugu quruxda badan ee uu leeyahay xitaa haddii uu magac xun lahaa wuxuu ugu bedelayay

magac qurux badan, tusaale: waxaa u yimid nebiga (NNKH) nin la dhoho حرب (dagaalle) markaas ayuu ugu badelay magaca سلم (Nabadle). Mid kale waxaa la dhihi jiray العاصي (Diidahaye), wuxuu ugu badelay magaca المطيع (Yeelahaye), iyo kuwo kale oo aad u badan ayuu ka badelay nebigu magacyo xun isagoo ugu badelaya kuwo wanaagsan. Arrintaasi waxay na tusinaysaa siduu nebigu (NNKH) nafsi ahaan ugu dhisayay bulshadiisa.

Waxa ay ogaadeen culimada naftu goor aan sii fogayn in magaca qofku saameyn xoog leh oo weliba qarsoon uu ku leeyahay kalsoonida qofka iyo dhaqankiisaba. Sidoo kale dadka kale laftooda inuu saameynayo magaca ay ugu yeerayaan qof kale. Nebi Muxamed se (NNKH) wuxuu sii ogaa arrintaas 1440 sano ka hor. Sidaas ayuuna ugu yeeri jiray qof kasta magaciisa ugu quruxda badan.

Si lamid ah nebigu (NNKH) wuxuu hodmiyay sarena u qaaday kartida qof kasta oo muslim ah uu u leeyahay inuu wax kusoo biiriyo bulshada uu la nool yahay, kagana kasbado magac iyo miisaan sareeya bulshadiisa dhexdeeda ilaa heer uu isku xiray nebigu (NNKH) waxqabaka qofeed ee bulsho iyo jacaylka Allaah uu qofkaas jecel yahay, waxaana ka mid ah axaadiista uu nebigu (CSW) uu kaga hadlay qodobkaan, xadiiska ah:

قال النبي صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: " أَحَبُّ النَّاسِ إِلَى اللَّهِ أَنْفَعَهُمْ لِلنَّاسِ"

**{Illaahay wuxuu ugu jecel yahay dadka kuwo ugu waxtarka badan dadkooda}.**

## Hormarintii Waxbarashada Madiina

Markuu Islaamku yimid ba wuxuu ku bilowmay ka hadalka akhriska iyo aqoonta. Sida la wada ogyahay suuradii ugu horeysay ee Qur'aanka soo degta waxay ahayd Suuratu AL-Iqra'

بسم الله الرحمن الرحيم ٱقۡرَأۡ بِٱسۡمِ رَبِّكَ ٱلَّذِي خَلَقَ (1) خَلَقَ ٱلۡإِنسَٰنَ مِنۡ عَلَقٍ (2) ٱقۡرَأۡ وَرَبُّكَ ٱلۡأَكۡرَمُ (3) ٱلَّذِي عَلَّمَ بِٱلۡقَلَمِ (4) عَلَّمَ ٱلۡإِنسَٰنَ مَا لَمۡ يَعۡلَمۡ (5)

Xilligaas carabta iyo inta badan ummadaha adduunka waxaa hogaanka u hayey jahliga iyo khuraafaadka, aqoontuna waxay ahayd wax aad u yar oo loo raadsado dadka wax ka haysta diimihii hore sida **Kiristanka** iyo **Yuhuuda.**

Markuu nebigu yimid magaalada Madiina wuxuu aad u dhiirigeliyay aqoonta iyo waxbarashada isagoo ka dhigay goleyaashiisa fadhi kuwo aqooneed oo ay ka aflaxaan dadka magaalada Madiina iyo guud ahaan ummada muslimiinta ah, sida uu ina tusinayo Qur'aanka kariimka ah:

يا أَيُّهَا الَّذينَ آمَنوا إِذا قيلَ لَكُم تَفَسَّحوا فِي المَجالِسِ فَافسَحوا يَفسَحِ اللَّهُ لَكُم وَإِذا قيلَ انشُزوا فَانشُزوا يَرفَعِ اللَّهُ الَّذينَ آمَنوا مِنكُم وَالَّذينَ أوتُوا العِلمَ دَرَجاتٍ وَاللَّهُ بِما تَعمَلونَ خَبيرٌ

Allaah wuxuu aad u amaanay aqoonta iyo ehelkeedaba, ilaa heer uu Illaahay isku xiray cibaadada iyo aqoonta. Wuxuuna yiri Illahay (SWT):

﴿ وَمِنَ النَّاسِ وَالدَّوَابِّ وَالْأَنْعَامِ مُخْتَلِفٌ أَلْوَانُهُ كَذَٰلِكَ ۗ إِنَّمَا يَخْشَى اللَّهَ مِنْ عِبَادِهِ الْعُلَمَاءُ ۗ إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ غَفُورٌ ﴾ الفاطر :28

Si la mid ah nebigu (CSW) wuxuu aqoonta uga hadlay axaadiis fara badan waxaana kamid ah xadiiska oranaya:

عن ابن مسعود رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم : "لا حَسَدَ إلا في اثنتين: رجل آتاه الله مالا، فسَلَّطَه على هَلَكَتِهِ في الحَقِّ، ورجل آتاه الله حِكْمَة، فهو يقضي بها ويُعَلِّمَها"

**{Looma hanqal taago labo qof mooyee: qof Illaahay siiyay hanti oo ku dhameeyay meel xaq ah, iyo qof Illahay siiyay aqoon oo ku kala saaraya dadka barayana.}**

Nebigu (NNKH) wuxuu ku amri jirey qof kasta oo waxbarta inuu isna sii gudbiyo aqoonta uu bartay, wuxuuna ku yiri wafdigii reer **Cabdiqays** markay laabanayeen “Markaad ku laabataan dadkiinii wax ka bara aqoonta aad soo qaadateen”

فقال: ( ارجِعوا إلى أهليكم فعلِّموهم ومُرُوهم وصلُّوا كما رأَيْتُموني أُصلِّي فإذا حضَرتِ الصَّلاةُ فليؤذِّنْ أحدُكم وليؤمَّكم أكبرُكم )

## Kacdoonkii Akhriska iyo Qoraalka ee Madiina

Markuu nebigu (CSW) yimid magaalada Madiina waxaa ka bilowday ololе iyo kacdoon aqooneed oo baaxad leh, gaar ahaan waxaa awooda la saaray wax qorida iyo wax akhrinta, iyadoo laga baranayo dadkii ku xeel dheeraa sida Yahuudii Madiina deganayd iyo qof kasta oo aqoon u lahaa qoraalka iyo akhriska. Waxaana kamid ahaa raggii ku xeel dheeraa akhrinta iyo qoraalka ee dugsiyada wax qorida iyo akhrinta ka furay magaalada Madiina asxaabigii la oran jirey **Cubaadatu Binu Saamit.**

Markuu dhacay dagaalkii **Badar** ee nebiga iyo muslimiintu kaga adkaadeen **Qureyshtii** waxaa laga qafaashay Qureysh maxaabiis badan, kuwaas oo lagu xiray siideyntooda madax furasho. Waxaana ka mid ahaa madax furashada qofkii kamid ah maxaabiista oo yaqaana wax akhrinta iyo qoraalka in loo dhiibo 10 qof oo reer madiina ah si uu u baro wax qorida iyo akhrinta. Maalinta qofka ugu dambeeya laga tijaaabiyo inuu waxna qori karo waxna akhrin karo waa la sii daynayay. Waana arin kale oo cajiib ah oo ina bareysa sida nebigeenu (NNKH) ugu dedaalayay waxbarida ummadiisa. Innaga ka Soomaali ahaan mudnaan badan ma siino wax akhrinta iyo waxqorida waana sababta ugu weyn ee aan uga dambeyno dadyowga asaageen ah. Nebigu (CSW) kuma gaabsan oo keli ah  barashada qoraalka iyo akhrinta luuqada carabiga ah ee wuxuu asxaabtiisa qaarkood u diray inay soo bartaan akhrinta iyo qoraalka luuqadaha qalaad, sida luuqada

**Cibriga** oo Yahuudu ku hadasho, waana cashar kale oo ina baraya in aqoonta waxtarka ah aan la kala xigin.

Intaas ka dib aad ayay ubaahday waxqorida iyo wax akhrinta, waxaana la qoray kitaabka **Qur'aanka Kariimka ah** xilligii nebigu (CSW) noolaa, sidoo kale waxaa la qoray qaybo ka mid ah axaadiista Rasuulka (CSW), waxayna gaareen dadka qora Qur'aanka iyo xadiiska xilligii nebigu noolaa 60 qoraa.

Waxaa kale oo ka qayb qaatay xiiso gelinta qoraalka iyo akhriska Qur'aanka kariimka ah oo faray in la qoro oo dukumiinti (Document) loo sameeyo wax kasta oo dayn ah ama xuquuq ah oo dadku kala qaato, sida Illaahay ku sheegay aayada ugu dheer Qur'aanka.

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا تَدَايَنتُم بِدَيْنٍ إِلَىٰ أَجَلٍ مُّسَمًّى فَاكْتُبُوهُ ۚ وَلْيَكْتُب بَّيْنَكُمْ كَاتِبٌ
بِالْعَدْلِ ۚ وَلَا يَأْبَ كَاتِبٌ أَن يَكْتُبَ كَمَا عَلَّمَهُ اللَّهُ ۚ فَلْيَكْتُبْ وَلْيُمْلِلِ الَّذِي عَلَيْهِ الْحَقُّ
وَلْيَتَّقِ اللَّهَ رَبَّهُ وَلَا يَبْخَسْ مِنْهُ شَيْئًا ۚ فَإِن كَانَ الَّذِي عَلَيْهِ الْحَقُّ سَفِيهًا أَوْ ضَعِيفًا أَوْ لَا
يَسْتَطِيعُ أَن يُمِلَّ هُوَ فَلْيُمْلِلْ وَلِيُّهُ بِالْعَدْلِ ۚ وَاسْتَشْهِدُوا شَهِيدَيْنِ مِن رِّجَالِكُمْ ۖ فَإِن لَّمْ
يَكُونَا رَجُلَيْنِ فَرَجُلٌ وَامْرَأَتَانِ مِمَّن تَرْضَوْنَ مِنَ الشُّهَدَاءِ أَن تَضِلَّ إِحْدَاهُمَا فَتُذَكِّرَ
إِحْدَاهُمَا الْأُخْرَىٰ ۚ وَلَا يَأْبَ الشُّهَدَاءُ إِذَا مَا دُعُوا ۚ وَلَا تَسْأَمُوا أَن تَكْتُبُوهُ صَغِيرًا أَوْ كَبِيرًا
إِلَىٰ أَجَلِهِ ۚ ذَٰلِكُمْ أَقْسَطُ عِندَ اللَّهِ وَأَقْوَمُ لِلشَّهَادَةِ وَأَدْنَىٰ أَلَّا تَرْتَابُوا ۖ إِلَّا أَن تَكُونَ تِجَارَةً
حَاضِرَةً تُدِيرُونَهَا بَيْنَكُمْ فَلَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَلَّا تَكْتُبُوهَا ۗ وَأَشْهِدُوا إِذَا تَبَايَعْتُمْ ۚ وَلَا يُضَارَّ
كَاتِبٌ وَلَا شَهِيدٌ ۚ وَإِن تَفْعَلُوا فَإِنَّهُ فُسُوقٌ بِكُمْ ۗ وَاتَّقُوا اللَّهَ ۖ وَيُعَلِّمُكُمُ اللَّهُ ۗ وَاللَّهُ بِكُلِّ
شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴾ البقرة: 282

Uma gooni ahayn barashada qoraalka iyo akhrintu raga Madiina oo keli ah, ee si la mid ah waxaa iyaguna baranayay gabdhaha magaalada Madiina, shakina kuma jiro inuu nebigu faray oo ku dhiirigeliyay gabdhaha Madiina inay waxbartaan si guud, gaar ahaan qoraalka iyo akhriska inay bartaan. Waxaana ka soo arootay nebiga (CSW) inuu ku yiri gabar la yiraahdo **Al shifaa bintu Cabadillaah** oo iyadu taqaanay akhriska iyo qoraalka "Maad barto gabadhaan Ruqiya ah (Xafsa bintu Cumar) dawada cudurka **Shiniyowga** sidaad u bartay qoraalka"

«أَلَا تُعلِّمِينَ هذه رُقيَةَ النَّملةِ كما علَّمْتِيها الكتابةَ.»

Waxaa jiray xilligii nebiga gabdho mucallimiin ah oo gabdhaha kale bara qoraalka iyo akhriska.

Ololehaas iyo kacdoonkaas kadib waxaa aad ubatay goobaha lagu barto qoraalka iyo akhriska ee magaalada Madiina gudaheeda heer 4 jibaar ah kahor imaanshihii nebiga (CSW) ee magaalada Madiina.

Intaas oo wada jirta haddana nebigeenu waxna ma qori jirin waxna ma akhrin jirin, sababtuna waa wax baahi ah uma qabin nebigu (NNKH) inuu wax qoro ama wax akhriyo (kicinta xuruufta). Maxaa yeelay wuxuu haystaa nebigu dhammaan aqoonta ugu sareysa ee uu makhluuq yeesho isagoo aan waxna qorin waxna akhrin, waana mucjiso uu Illaahay siiyay nebiga(NNKH).

## Hormarintii Caafimaadka ee Madiina

Magaalada Madiina waxay ahayd ka hor imaanshaha Rasuulka (SCW) magaalo la daalaa dhacaysa cuduro badan sabab la xiriirta wasakhowga deegaanka oo ahaa meel beeraley ah oo biyo fariisina leh. Markuu yimidba nebigu (NNKH) wuxuu ugu duceeyay magaalada Madiina caafimaad sidaan kusoo qaadanay xadiiskii ahaa:

قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: "اللَّهُمَّ حَبِّبْ إِلَيْنَا المَدِينَةَ كَحُبِّنَا مَكَّةَ أَوْ أَشَدَّ، اللَّهُمَّ بَارِكْ لَنَا فِي صَاعِنَا وَفِي مُدِّنَا، وَصَحِّحْهَا لَنَا، وَانْقُلْ حُمَّاهَا إِلَى الجُحْفَةِ"

Intaas kadib nebigu wuxuu ku amray dhammaan dadka Madiina degan inay is nadiifiyaan. Waxaana kamid ahaa axaadiista uu nebigu (NNKH) kaga hadlay nadaafada:

ما رواه أبو هريرة رضي الله عنه أن النبي ﷺ قال: "الفطرة خمس: الختان، والاستحداد، وقص الشارب، وتقليم الأظفار، ونتف الإبط"

**{Shan waa abuurida saxda ah: Gudniinka, is hagaajinta, jarida shaarbaha, jarida cidiyaha iyo tifida kilkisha}.**

Waxaa kale oo uu amray nebigu (NNKH) in la nadiifiyo dhammaan wadooyinka iyo barxadaha magaalada Madiina iyo sidoo kale qof kasta inuu nadiifiyo gurigiisa iyo goobtiisa. Waxaana ka mid ahaa axaadiistii cajabta lahayd ee uu nebigu kaga hadlay nadaafada magaalada Madiina iyo deegaankeeda inuu yiri:

(إِنَّ اللَّهَ طَيِّبٌ يُحِبُّ الطَّيِّبَ، نَظِيفٌ يُحِبُّ النَّظَافَةَ، كَرِيمٌ يُحِبُّ الكَرَمَ، جَوَادٌ يُحِبُّ الجَوَادَ؛ فَنَظِّفُوا أَفْنِيَتَكُمْ (أي ساحات بيوتكم)، ولا تَشَبَّهُوا بِاليَهُودِ)

Wuxuu kaloo amray in qashinka laga fogeeyo meel kasta oo la degan yahay siduu yiri Rasuulku (SCW)

عن أبي ذر الغفاري رضي الله عنه أن النبي ﷺ قال: (عُرِضَتْ عَلَيَّ أَعْمَالُ أُمَّتِي : حَسَنُهَا وَسَيِّئُهَا، فَوَجَدْتُ فِي مَحَاسِنِ أَعْمَالِهَا الأَذَى يُمَاطُ عَنِ الطَّرِيقِ...) (رواه مسلم )

عن أبي هريرة رضي الله عنه قال ﷺ: (لَقَدْ رَأَيْتُ رَجُلًا يَتَقَلَّبُ فِي الجَنَّةِ، فِي شَجَرَةٍ قَطَعَهَا مِنْ ظَهْرِ الطَّرِيقِ، كانَتْ تُؤْذِي النَّاسَ) (رواه مسلم)

قال ﷺ: (الإِيمَانُ بَضْعٌ وَسَبْعُونَ شُعْبَةً... وَأَدْنَاهَا إِمَاطَةُ الأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ) (متفق عليه)

عن جابر بن عبد الله قال سمعت رسول الله ﷺ يقول: (غَطُّوا الإِنَاءَ، وَأَوْكُوا السِّقَاءَ، فإنَّ فِي السَّنَةِ لَيْلَةً يَنْزِلُ فيها وَبَاءٌ، لا يَمُرُّ بإناءٍ ليسَ عليه غِطاءٌ، أَوْ سِقَاءٍ ليسَ عليه وِكَاءٌ، إِلَّا نَزَلَ فيه مِن ذلكَ الوَبَاءِ) (رواه مسلم )

Dhammaan axaadistaas waxay in barayaan in la nadiifiyo deegaanka guud ahaan iyo gaar ahaan, qof kastana gurigiisa nadiifiyo  la iskana ilaaliyo jeermiska iyo waxyaabaha keena jeermiska.

Wacyigelintaas nadaafada oo ah furaha caafimaadka iyo ka hortaga cudurada ka dib nebigu wuxuu dhiirigeliyay isdaweynta, wuxuuna yiri:

قال ﷺ: "ما أنزل الله داءً إلا أنزل له شفاءً"

**{Illaahay masoo dajin cudur ilaa uu ka soo raaciyay dawadiisa}**

Si gaar ah nebigu (NNKH) wuxuu jeclaa isku daweynta waxyaabaha dabiiciga ah sida: malabka, toobitaanka iyo is gubida, waxaana kasoo aroortay nebiga inuu yiri: "Caafimaadku waa saddex: kabo malab ah iyo mar istoobida iyo mar isgubida, wuxuuna uga digay ummadiisa is gubitaanka faraha badan"

قال النبي ﷺ: "الشِّفاءُ في ثلاثَةٍ: شَربةِ عَسَلٍ، وشَرطةِ مِحجَمٍ، وكَيَّةِ نارٍ، وأنهى أُمَّتي عن الكيِّ" (صحيح البخاري )

Wuxuu nebigu (NNKH) meel adag ka istaagay waxyaabihii khuraafaadka ahaa ee cudurada keeni jiray gaar ahaan cudurada nafta ku dhaca keeni jiray oo ay dhaqanka u la haayeen dhammaan carabtu gaar ahaan reer madiina sida: shimbir baasaysigii iyo balaayo filashadii. Wuxuun ugu badelay same-saadsi iyo wanaag filasho.

Wuxuu kale oo uu awooda saaray nebi Muxamed (NNKH) ka hortagida cudurada faafa الطب الوقائي, waana isagii nebigu ku lahaa xadiiska:

"إذا سمعتم الطاعونَ بأرض فلا تدخلوها وإذا وقع بأرض وأنتم فيها فلا تخرجوا منها"

**{Haddaad ku maqashaan dhul inuu ka jiro xanuun saf mar ah ha gelinina dhulkaas, hadduu ka dhaco xanuunku dhul aad joogtaana haka bixinina}**

Sidoo kale nebigu (NNKH) wuxuu dadka kula taliyey inay yaraystaan qaadashada cuntooyinka si caafimaadkoodu u sugnaado, wuxuuna sheegay Rasuulku(NNKH) in cudurada ugu badan ee dadka ku dhaca ay ka yimaadaan caloosha buuxda, wuxuuna yiri Rasuulku (NNKH):

"مَا مَلأَ آدَمِيٌّ وِعَاءً شَرًّا مِنْ بَطْنٍ، بِحَسْبِ ابْنِ آدَمَ أُكُلاَتٌ يُقِمْنَ صُلْبَهُ، فَإِنْ كَانَ لاَ مَحَالَةَ، فَثُلُثٌ لِطَعَامِهِ، وَثُلُثٌ لِشَرَابِهِ، وَثُلُثٌ لِنَفَسِهِ "

Xikmadaan nebawiga ahi waa fariin iyo wacyigelin ku socota dhammaan bini Aadamaka, waxaana la ogyahay maanta in cudurada ugu badan ee ku dhaca dadka ay ka yimadaan cuntada xad dhaafka ah ee uu calooshiisa geliyo ina Aadam ilaa heer 80% ay dhakhaatiirta qaarkood gaarsiiyeen in cudurada dadka ku dhaca sababtooda ay tahay cuntada badan ee aan isku dheelitirnayn. Qaar ka mid ah isbitaalada ugu waaweyn adduunka waxaa astaan u ah ama hal-hays u ah oraahda ah “**Calooshu waa guriga cudurka”.**

Nebigu (NNKH) wuxuu qiray oo ogolaaday inuu is daweeyo oo uu isbitaal tago qofka xanuunsan sida uu kula taliyay saxaabigiisii la oron jiray **Sacad binu Abii Waqaas** markuu ku xanuunsaday xajkii **Sagootiska.** Intii uu noolaa aayana la dhisay Cusbitaalkii ugu horeeyay ee islaamka dhexdiisa laga hirgeliyo waxaan dhinaca loogu qabtay masaajidka nebiga, waxaana masuul looga dhigay gabar la oran jiray **Rufeydata AL Aslamiya,** waxaana la

hirgeliyay isbitaalkaas intii lagu jiray dagaaalkii **Isbahaysiga** غزوة ( الاحزاب)

قال النبي ﷺ: "اجعلوه في خيمة رفيدة التي في المسجد حتى أعوده من قريب "

Talaabooyinkaas isugu jira ducada, wacyigelinta nadaafada, ka takhaluska khuraafadka, ka hortaga cudurada iyo faafidooda iyo isdaweynta sharciga waafaqsan oo uu qaaday nebigu (NNKH) kadib waxay si buuxda wax uga badeleen xaaladii caafimaad ee magaalada Madiina ilaa maantana waa magaalada ugu sixada iyo caafimaadka sareysa magaalooyinka aduunka oo dhan.

## Hormarintii Dhaqaalaha Madiina

Rasuulkeenu wuxuu ahaa yaraantiisii laga soo bilaabo qof wax soo saar leh, wuxuuna ku shaqeysan jirey isagoo aan 10 sano gaarin raacida aryaha magaalada Maka AL-Mukarama, si uu u maareeyo noloshiisa una caawiyo adeerkiis Abuu Dhaalib oo soo koriyay siduu ku sheegay Rasuulku (NNKH) xadiiskaan:

عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبيِّ صلى الله عليه وسلم قال: "ما بَعَثَ اللهُ نبياً إلا رَعَى الغَنَمَ، فقالَ أصحابُهُ: وأنتَ؟، قال: نعم، كُنتُ أرعَاها على قَرَارِيطَ لأهلِ مكةَ "

Markuu nebigu noqday barbaar wuxuu ku biiray ganacsiga, wuxuuna la shaqaysan jiray gabadha la yiraahdo **khadiijata Bintu Khuweylad** oo kamid ahayd maal qabeenka magaalada

Makka, isagoo umaamulayay hantideeda ulana safri jiray meelihii ganacsiga loo aadi jiray sida: Shaam.

Wuxuu jeclaaa Rasuulku in qofka muslimka ah uu ahaado qof shaqeeya oo wax soo saar leh, sida uu ku sheegay xadiiskaan:

"ما أكل أحد طعامًا قط خيرًا من أن يأكل من عمل يديه، وإن نبي الله داود كان يأكل من عمل يده"

**{Qofna ma cuno raashin ka fiican midkuu ku shaqeystay gacantiisa, nebigii Illaahay ee Daa'uud wuxuu ku shaqeysan jiray gacantiisa}.**

In badan ayuu nebigu tusaale ugu soo qaadan jiray saaxaabadiisa nebiyadii Illaahay ee wax soo saarka lahaa, sida markuu lahaa "Nebi Zakariye wuxuu ahaa farayaamo"

عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: "كان زكريا - عليه السلام- نجَّارا"

Markuu yimid nebigu magaalada Madiina wuxuu dadka faray in la shaqeysto waxna lala soo abxo, si gaar ah wuxuu dhiirigelin jiray nebigu dadka xirfadlayaasha u ah magaalada sida dawaarleyaasha, birtumaha iyo kabo toleyaasha, ilaa uu nebigu wiilkiisii Ibraahim u kireeyay hooyo uu qabay nin birta tuma si ay naaska u nuujiso, wuxuuna uga danlahaa nebigu arrintaas in ay meesha ka baxdo aragtidii khaldanayd ee ay qabeen dadka carbta ah gaar ahaan reer Madiina ee ahayd in la yaso xirfadaha waxtarka u leh bulshada iyo dadka xirfadahaas ka shaqeeyaba.

Malahayga Soomaalidu weli kama tanaasulin aragtida ah in la ceebeeyo xirfadaha waxtarka u leh bulshada sida: kabo tolida, birtumida iyo wixii la mid ah, ilaa marka dambe la waayo wax qabta shaqooyinkaas, dadkuna magan u nqodaan kabo toleyaal iyo tumaalo ajaanib ah, waana sida manta soomaalida dhexdeeda ka jirta.

## Ganacsigii Madiina

Xilligii Rasuulku imaanayay magaalada Madiina ganacsigeedu wuxuu gacanta ugu jiray Yahuudii magaalada deganayd gaar ahaan qabiilka la yiraahdo reer **Qaynu-qaac** oo Yahuuda kamid ah. Suuqa ugu weyn ee magaalada Madiina magaciisu wuxuu ahaaba **Suuqa Qaynu-qaac.** Markaas ayuu nebigu (NNKH) bilaabay inuu hormariyo sarena u qaado ganacsiga muslimiinta Madiina degan, isagoo aan waxaba u dhimayn ganacsigii Yuhuuda.

Magaalada Madiina waxay hodan ku ahayd beerashada timirta iyo wax soo saar kale oo beereed, sidoo kale waxay lahayd Madiina wax yar oo wax soo saar warshadeed ah sida: soo saarida weelasha, hubka iyo wax kamid ah dharka, laakiin dhibtu waxay ka jiratay hantida iyo lacagaha kaashka ah waxaa gacanta ku hayay Yahuuda oo cidii kale ee wax u baahata iyaga ayay ka amaahan jireen, iyagoo weliba Ribo saaranaya.

Nebiga (NNKH) waxaa la socaday dad reer Makaad ah mudo dheerna ganacsato soo ahaa, waxaana ka mid ahaa: Cumar Binu Khadhaab, C/raxmaan Binu Cawf iyo asxaab kale oo muhaaajiriin ah, markay damceen inay suuqa galaan oo ay ganacsadaan waxay la kulmeen suuqii oo u xiran Yahuuda, oo cid aan iyaga ahayn aysan waxba uga ogalayn. Markaas waxaa khasab noqotay in muslimiinta Madiina ay helaan suuq xor oo iyaga u gaar ah, sidaas ayuuna nebigu (NNKH) ku dhisay suuq yar oo ku yaala magaalada Cirifkeeda, wuxuuna u bixiyay magaca **Goob yartii ina Zubeyr** ( بقيع ابن الزبير ), markuu dhameeyay ayuu ku yiri: "Waakan suuqiinii ee ku shaqaysta".

Isla markiiba waxaa ka carooday suuqaas cusub ee nebigu ka dhisay magaalada dacalkeeda ganacsatadii waa-wayneed ee yahuuda, waxayna u arkeen inuu khatar ku yahay suuqooda iyaga u xiran oo dadkii lala qaybsanayo, markaas ayuu ganacsadihii caanka ka ahaa Madiina ee Yahuudiga ahaa ee la oran jirey **Kacab binu Ashraf,** wuxuu ku duulay suuqii cusbaa wuuna dumiyay. Arrintaas markay dhacday waxaa loo sheegay nebiga (NNKH) wuxuuna yiri: "Dhib ma laha, waxaan ka dhisaynaa suuq kale meel ay kasii necebyihiin"

«لا جرم، لأنقلنها إلى موضع هو أغيظ له من هذا»

Wuxuuna ka dhisay nebigu (NNKH) suuq weyn oo hormarsan magaalada Madiina bartankeeda, wuxuuna u bixiyay magaca **Suuq Al Manaakh.** Markuu dhammeeyayna nebigu (NNKH)

wuxuu ku yiri muslimiinta Madiina " Waa kan suuqiinii, la iskuma ciriirin karo, lamana kala kireysan karo, oo waa suuq xor ah"

"هَذَا سُوقُكُمْ فَلَا يَضِيقُ وَلَا يُؤْخَذُ مِنْهُ خَرَاجٌ"

Wuxuu Rasuulku (NNKH) u dajiyay suuqaan cusub xeerar ganacsi oo cajiib ah oo ka dhigay suuqii cusbaa suuqa ugu weyn ee magaalada Madiina ay ka adeegato, ilaa uu noqday suuq weyn oo ay usoo safraan dadkii deganaa jasiirada carabta, waxaana ka mid ahaa xeerarkaas:

B. In ganacsiga suuqaan yahay mid xor ah oo aan cidna u xirnayn

T. In wax kiro ah aan laga qaadi Karin qafkii ku ganacsanaya suuqaan

J. In ribadu ay mamnuuc ka tahay suuqaan gudihiisa

X. In khiyaanadu ka reeban tahay dhammaan ganacsatada suuqaan

Iyo xeerar kale oo ku qoran kutubta Fiqhiga Islaamiga ah qaybtooda ganacsiga ah.

Intaas wixii ka dambeeyay waxaa kor u kacay dhaqaalihii magaalada Madiina, gaar ahaan ganacsigii ayaa bulaalay ilaa heer uu isu badelay ganacsigii magaalada Madiina mid heer gobol ah oo isku xira dhammaan ganacsiyada deegaanada carabtu degi

jirtay. Sidaas ayay madiina ku noqotay xarun dhaqaale iyo ganacsi.

Sida aan u wada jeedno diinta Islaamku waa manhaj ka dhameystiran dhan kasta oo looga baahan yahay nolosha Aadanaha, waxayna dadkeeda faraysaa hormarinta qaybaha nolosha oo dhan, haday tahay waxbarasho, ganacsi, caafimaad iyo dhammaan adeegyada bulshadu u baahan tahay,waana ceeb iyo faham la'aan in dadka haysta diinta noocaas ah ay u baahdaan ama u hanqal taagaan ama u cararaan ummada kale oo ayagu haysan diintaan cajiibka ah.

## Dhismihii Dowladii Islaamka

Dadkii carabta waxay ahaayeen si guud, gaar ahaan dadkii deganaa **Xijaas** iyo **Najdi** kuwo ka fog wax kasta oo nidaam iyo kala dambayn ah, waxayna isu maamuli jireen hab qabiil oo ku dhaqma xeerar qabiil oo aan midaysanayn reer walba iyo xeerkiisa. Inta badana lama dhaqan galin jirin xeerarkaas qabiilada. Sida manta oo la joogo aad moodo inay tahay Soomaalidu, kamana jirin Makka iyo Madiina toona wax hogaan ah oo sugan oo aan ka ahayn kan qabiilka ilaa uu ka yimid Islaamku oo wata nidaam dowli ah oo dhameystiran oo cadaaladu sal u tahay, nidaamkaas oo uu hogaanka u hayo nebi Muxamed (NNKH) sida uu Illaahay ku sheegay kitaabkiisa:

﴿ لَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلَنَا بِالْبَيِّنَاتِ وَأَنزَلْنَا مَعَهُمُ الْكِتَابَ وَالْمِيزَانَ لِيَقُومَ النَّاسُ بِالْقِسْطِ ۖ وَأَنزَلْنَا الْحَدِيدَ فِيهِ بَأْسٌ شَدِيدٌ وَمَنَافِعُ لِلنَّاسِ وَلِيَعْلَمَ اللَّهُ مَن يَنصُرُهُ وَرُسُلَهُ بِالْغَيْبِ ۚ إِنَّ اللَّهَ قَوِيٌّ عَزِيزٌ﴾ الحديد 25

﴿ ۞ إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَن تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَىٰ أَهْلِهَا وَإِذَا حَكَمْتُم بَيْنَ النَّاسِ أَن تَحْكُمُوا بِالْعَدْلِ ۚ إِنَّ اللَّهَ نِعِمَّا يَعِظُكُم بِهِ ۗ إِنَّ اللَّهَ كَانَ سَمِيعًا بَصِيرًا﴾ النساء :58

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ وَأُولِي الْأَمْرِ مِنكُمْ ۖ فَإِن تَنَازَعْتُمْ فِي شَيْءٍ فَرُدُّوهُ إِلَى اللَّهِ وَالرَّسُولِ إِن كُنتُمْ تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ۚ ذَٰلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا﴾ النساء :59

Rasuulka ayaa ahaa hogaamiyaha dowlada Islaamka isaga ayaana magacaabi jiray xilalka dowlada una kala qaybin jiray shaqooyinkooda, laga bilaabo maalintii hashiiskii Al-caqaba ee labaad uu dhacay nebigu (NNKH) wuxuu ku dedaalayay in lagu shaqeeyo nidaam dowli ah oo shaqadu kala qaybsan tahay la iskulana xisaabtamayo, heshiiskaas oo rag iyo dumarba lala galayna wuxuu lahaa macne gaar ah, sida Illaahay uu Qur’aankiisa ku sheegay:

﴿ يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ إِذَا جَاءَكَ الْمُؤْمِنَاتُ يُبَايِعْنَكَ عَلَىٰ أَن لَّا يُشْرِكْنَ بِاللَّهِ شَيْئًا وَلَا يَسْرِقْنَ وَلَا يَزْنِينَ وَلَا يَقْتُلْنَ أَوْلَادَهُنَّ وَلَا يَأْتِينَ بِبُهْتَانٍ يَفْتَرِينَهُ بَيْنَ أَيْدِيهِنَّ وَأَرْجُلِهِنَّ وَلَا يَعْصِينَكَ فِي مَعْرُوفٍ ۙ فَبَايِعْهُنَّ وَاسْتَغْفِرْ لَهُنَّ اللَّهَ ۖ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ﴾ الممتحنة:12

Waxaa kale oo Rasuulku qaatay qorshaha maamul daadejinta oo ugu yaraan saddexdii qof ee meel ku wada nool inay lagama maarmaan u tahay in ay helaan hogaan suuban, sida uu ku sheegay Rasuulku (NNKH) xadiiskaan:

عن عبد الله بن عمرو أن النبي صلى الله عليه وسلم قال : { لا يحل لثلاثة يكونون بفلاة من الأرض إلا أمروا عليهم أحدهم } رواه أحمد

Nebigu (CSW) waxa uu ku maamuli jiray kuna rabeeyay dowladiisii Islaamka ciidan iyo shibilba kala dambayn, saraynta sharciga iyo isu dhego nugayl, sida uu ku sheegay Rasuulku xadiiskaan:

عن أنس رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: ((اسمعوا وأطيعوا، وإن استُعمل عليكم عبدٌ حبشي، كان رأسه زبيبة)) رواه البخاري

Markuu nebi Muxamed (NNKH) yimid magaalada Madiina kadib waxay noqotay  Madiino xarunta laga maamulo dhammaan degaanadii uu Islaamku gaaray, inta uu joogo Rasuulku magaalada isaga ayaa maamuli jiray oo u qumi jiray wax kasta oo looga baahan yahay hogaamiye daacad u ah ummadiisa, markuu meel aadana wuxuu xilka magaalada Madiina kusii wareejin jiray qof u qalma maamulida magaaladaan muhiimka ah. Dadkii ugu caansanaa ee nebigu (NNKH) uga tagey maamulida magaalada Madiina waxaa ka mid ahaa asxaabigii la oran jiray **C/laahi binu Umi Maktuum** wax ku dhow 13 jeer ayuu saxaabigaan masuul ka noqday magaalada Madina, mararka qaarna wuxuu uga tagey nebigu (NNKH) maamulida magaaldaan **Cusmaan binu Cafaan** mar kalena **Cali binu Abii-dhaalib.**

Rasuulku wuxuu u magacaabay dhammaan deeganada kale ee Islaamku gaaray maamulo hoos taga caasimada Madiina

ee Islaamka laga xukmo, waxaana ka mid ahaa maamulkii Yaman ee magaalada Sanca ee uu gudoomye uga dhigay nebigu (NNKH) ninkii la oran jiray **Baadaan binu Saasaan.** Sidoo kale magaalada **Zabiida** oo isla Yaman ah wuxuu gudoomiye uga dhigay nebigu (NNKH) saxaabigii la oran jiray **Abuu Muusaa AL-Ashcari,** waxaa kaloo uu maamul u magacaabay nebigu magaalada Makka wuxuuna gudoomiye uga dhigay saxaabi la yiraahdo **Citaab binu Usayd,** sidoo kale Dhaa'if waxaa gudoomiye loogu magacaabay **Cusmaan binu Abii AL-Caas,** Baxrayna waaxaa loo dhiibay saxaabiga la yiraahdo **AL-Calaa binu AL-xadrami** iyo Cumaan oo loo daayay inay sii maamulaan labadii boqor ee horay umaamuli jiray markii ay soo islaameen.

Rasuulku isaga oo ahaa hogaamiyaha ugu sareeya ee dowlada Islaamka, ahaana nebigii Illaahay oo wax kasta xagga Allaah laga ogeysiinayay haddan wuxuu aad ula tashan jiray asxaabtiisa, si uu salka ugu dhigo nidaam dowladeed oo ku dhisan wadar ogol iyo wada tashi, Allaah ayaana ku amaanay nebiga iyo dhammaan muslimiinta kitaabkiisa dhexdiisa inay markasta badiyaan wada tashiga, wuxuuna yiri Illaahay (SWT):

وَالَّذِينَ اسْتَجَابُوا لِرَبِّهِمْ وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَأَمْرُهُمْ شُورَىٰ بَيْنَهُمْ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنفِقُونَ﴾

[الشورى: 38 ]

فَبِمَا رَحْمَةٍ مِّنَ اللَّهِ لِنتَ لَهُمْ ۖ وَلَوْ كُنتَ فَظًّا غَلِيظَ الْقَلْبِ لَانفَضُّوا مِنْ حَوْلِكَ ۖ فَاعْفُ عَنْهُمْ وَاسْتَغْفِرْ لَهُمْ وَشَاوِرْهُمْ فِي الْأَمْرِ ۖ فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ ۚ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَوَكِّلِينَ﴾

[آل عمران: 159 ]

Aayadahaas kariimka ah kadib nebiga iyo saxaabada waxaa dhaqan u noqotay in ay go'aan kasta oo ay qaadanayaan ka hormariyaan ka tashiga go'aankaas, ilaa saxaabadu ay caan ku noqdeen naynaasta ah **Dadkii Wada tashiga**

(اصحاب الشورى).

## Cadaalada iyo Sinaaanta

Cadaaladu waa aragti Islaami ah oo lagama maarmaan u ah bini Aaadamka dhammaantiis, waana dhaqan laga rabo qof kasta oo muslim ah in ay dabeecad u noqoto si guud iyo si gaar ah haddii uu wax masuuliyad ah u hayo ummada. Cadaaladu waa muunad lagama maarmaan ka ah meel kasta iyo xilli kasta oo la joogo sida Illaahay ku sheegay kitaabkiisa:

﴿ إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَانِ وَإِيتَاءِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَيَنْهَىٰ عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنكَرِ وَالْبَغْيِ ۚ يَعِظُكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ﴾ النحل:90

﴿ إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَن تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَىٰ أَهْلِهَا وَإِذَا حَكَمْتُم بَيْنَ النَّاسِ أَن تَحْكُمُوا بِالْعَدْلِ ۚ إِنَّ اللَّهَ نِعِمَّا يَعِظُكُم بِهِ ۗ إِنَّ اللَّهَ كَانَ سَمِيعًا بَصِيرًا﴾ النساء:58

﴿ فَلِذَٰلِكَ فَادْعُ ۖ وَاسْتَقِمْ كَمَا أُمِرْتَ ۖ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ ۖ وَقُلْ آمَنتُ بِمَا أَنزَلَ اللَّهُ مِن كِتَابٍ ۖ وَأُمِرْتُ لِأَعْدِلَ بَيْنَكُمُ ۖ اللَّهُ رَبُّنَا وَرَبُّكُمْ ۖ لَنَا أَعْمَالُنَا وَلَكُمْ أَعْمَالُكُمْ ۖ لَا حُجَّةَ بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمُ ۖ اللَّهُ يَجْمَعُ بَيْنَنَا ۖ وَإِلَيْهِ الْمَصِيرُ ﴾

[الشورى: 15 ]

﴿ وَلَا تَحْسَبَنَّ اللَّهَ غَافِلًا عَمَّا يَعْمَلُ الظَّالِمُونَ ۚ إِنَّمَا يُؤَخِّرُهُمْ لِيَوْمٍ تَشْخَصُ فِيهِ الْأَبْصَارُ ﴾ إبراهيم:42

Dhammaan aayadahaas waxay nafarayaan cadaalada iyo wanaageeda, waxayna naga reebayaan dulmiga iyo xumaantiisa.

Cadaaladu khaas kuma aha xilliga garsoorka keliya ee waa dhaqan la rabo mar kasta iyo meel kasta oo la joogo, waana u bucda wax maamulida oo qof kasta oo masuul ah waxaa lagama maarmaan u ah cadaalad inuu kula dhaqmo dadka uu masuulka ka yahay ama xitaa shaqadu ay kala dhaxayso. Cadaaladu waxa ay galaysaa shaqo kasta oo uu qofku qabanayo xitaa mida gurigiisa iyo qoyskiisa uu ka qabanayo, waxayse u kala sareysaa hadba sida masuuliyadu u kala weyn tahay oo isku mid maaha cadaalada hogaamiyaha guud ee dalka iyo aabbaha gurigiisa maamulaya, ayadoo labadaba cadaalad laga rabo.

Nebigu (NNKH) wuxuu in badan uga digay ummadiisa cadaalad darada iyo dulmiga sida uu ku sheegay xadiiskaan; "اتَّقُوا الظُّلمَ ؛ فإنَّ الظُّلمَ ظُلُماتٌ يومَ القيامةِ"

**{Iska ilaaliya dulmiga, maxaa yeelay dulmigu wuxuu ka mid yahay madowyada maalinta qiyaame}.**

Sidoo kale nebigu (NNKH) wuxuu ku hirgaliyay cadaalada iyo sinaanta dhammaan bulshadii uu la noolaa, wuxuuna diiday in lagu kala sareysiiyo dadka qabiil iyo xoog, siduu ku sheegay xadiiskaan;

"لما سرقت المخزومية في مكة يوم الفتح قالوا: مَن يشفع فيها لعلها لا يُقام عليها الحدُّ؟ فطلبوا من أسامة بن زيد مولى الرسول ﷺ أن يتقدَّم، فقال له النبيُّ ﷺ: أتشفع في حدٍّ من حدود الله؟! وغضب عليه الصلاة والسلام، وقال: إنما أهلك مَن كان قبلكم أنَّهم كانوا إذا سرق فيهم الشريفُ تركوه، وإذا سرق فيهم الضعيفُ أقاموا عليه الحدَّ، وايمُ الله، لو أنَّ فاطمة بنت محمدٍ سرقتْ لقطعتُ يدها"

**{Wax ayay xaday gabar qureyshiyad ah kana sii ah reer Makhzuum maalintii Makka la furtay, markaas ayay ugu tageen nebiga (NNKH) ergo ahaan si gabadhaan qureyshiyada ah aan xadka looga fulin, nebiguna (NNKH) aad ayuu uga carooday arrintaas wuxuuna yiri: "Waxaa loo baa bi'iyay dadkii idnka horeeyay in ay xadka fulintiisa ka deyn jireen midkooda sare kuna fulin jireen xadka qofkooda jilicsan, Illaahay baan ku dhaartaye haday Faadumo oo ina Muxamed ah ay wax xado waxaan jarayaa gacanteeda}.**

Rasuulka laftiisa ayaa ahaa garsoore kala saara ummadiisa, wuxuuna ku dedaali jiray cadaalada mana ogolaan jirin wax

yar oo cadaalad daro u muuqda, wuxuuna uga digi jiray dadka uu kala saarayo in ay wax isku qariyaan, sida kasoo aroortay Rasuulka suuban;

عن أُمُّ سَلَمَة رضي الله عنها أن رسول الله صلى الله عليه وسلم سَمِعَ جَلَبَةَ خَصْمٍ بِبَابِ حُجْرَتِهِ، فَخَرَجَ إِلَيْهِمْ، فقال: "ألا إنما أنا بشر، وإنما يأتيني الخصم، فلعل بعضكم أن يكون أبلغ من بعض؛ فَأَحْسِبُ أَنَّهُ صَادِقٌ؛ فَأَقْضِي لَهُ، فمن قضيت له بحق مسلم فإنما هي قطعة من نار، فَلْيَحْمِلْهَا أَوْ يَذَرْهَا"

**{Wuxuu maqlay Rasuulku (CSW) dood ka dhacaysa albaabkiisa, markaas ayuu usoo baxay si uu u kala saaro, wuxuuna ku yiri; "Anigu waxaan ahay qof idin la mid ah waxaa laga yaabaa inaad ku kala aftahansan tihiin dood gudbinta oo markaa aan u xukumo kii doodiisu ay sareyso anigoo u malaynaya inuu xaq leeyahay, haddaba waxaan idiin sheegayaa qofkii aan u xukumo xaq uusan lahayn waxaan u gooyay qayb naar ah, ha qaato ama ha iska daayo}.**

Garsoorkii nebi Muxamed (NNKH) kuma ekayn muslimiinta oo waxaa la wadaagay gaaladii la noolayd, wuxuuna u xaqsoori jiray xabiibku (NNKH) gaal iyo islaamba cidii xukun ugu timaada,.

Wuxuu kale oo nebigu (NNKH) cadeeyay in aan xujo been abuur ah oo qofku la yimaado uusan ku muteysanayn xaq qof kale lee yahay sida qofkii ku dhaarta xaq uusan lahayn, wuxuuna yiri nebigu (CSW);

«مَنِ اقْتَطَعَ حَقَّ امْرِئٍ مُسْلِمٍ بِيَمِينِهِ، فَقَدْ أَوْجَبَ اللهُ لَهُ النَّارَ، وَحَرَّمَ عَلَيْهِ الْجَنَّةَ»

**{Qofkii ku qaata dhaar been ah xaq uusan lahayn Illaahay wuxuu u waajibiyay Naar Janadana wuu ka mamnuucay)**

Islaamku wuxuu hirgaliyay nidaam garsoor oo dhameystiran kaas oo si toos ah uga tarjumaya cadaalada iyo sinaanta, nidaamkaas oo leh xeerar heer sare ah oo fara badan, waxaana ka mid ah xeerarkaas:

B. In cadaynta laga rabo qofkii wax sheeganaya, dhaartuna ay tahay is difaaca qofka wax lagu sheeganayo, siduu nebigu (NNKH) sheegay:

"البينة على المدعي، واليمين على من أنكر"

T. In garsooruhu uusan ka gar naqi Karin dacwad dheefi ugu jirto isaga dhinacyada doodaya qaarkood, sida waalidkiis, ilmihiisa, xaaskiisa IWM.

J. Marka garsooruhu garta qaadayo waa in uu ka maran yahay dhammaan wax kasta oo wax u dhimaya hab fikirkiisa si uu usoo saaro xukun shin ah (buuxa) oo laga baaraan dagay.

X. In garsooruhu u simo dhinacyada garta loo qaadayo wax kasta xataa fiirinta iyo la hadalka waa inuu usimaa.

Qur'aanku wuxuu xusay in qofka muslimka ah markasta cadaalad laga rabo xataa hadduu ku markhaati kacayo dadka kuwa ugu

dhow, sida waalidkiis iyo xigtadiisa, sida uu Illaahy ku sheegay qur’aankiisa kariimka ah;

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُونُوا قَوَّامِينَ بِالْقِسْطِ شُهَدَاءَ لِلَّهِ وَلَوْ عَلَىٰ أَنفُسِكُمْ أَوِ الْوَالِدَيْنِ وَالْأَقْرَبِينَ ۚ إِن يَكُنْ غَنِيًّا أَوْ فَقِيرًا فَاللَّهُ أَوْلَىٰ بِهِمَا ۖ فَلَا تَتَّبِعُوا الْهَوَىٰ أَن تَعْدِلُوا ۚ وَإِن تَلْوُوا أَوْ تُعْرِضُوا فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا﴾

[ النساء: 135 ]

Nebigu (NNKH) wuxuu sheegay in garsoorayaashu saddex yihiin, labo Naarta galeysa iyo mid Janada galaya. Labada naarta galaysa waa garsoore xukumay cadaalad daro isagoo garanaya xaqa iyo cadaaladu meesha ay ka jirto , kaasi Naarta ayuu galayaa. Midka labaadna waa garsoore wax iska xukuma isagoo jaahil ah oo aan waxba ka baran cilmiga garsoorka ee Islaamiga ah, isna Naarta ayuu dalaq dhahayaa. Midka Janada galaya waa garsooraha xukunkiisu ku qotomo shereecada Islaamka oo si cadaalad ah wax u xukuma, aqoon buuxdana u leh xukunka uu galayo.

"القضاة ثلاثةٌ قاضيانِ في النارِ وقاضٍ في الجنةِ فأما الذي في الجنةِ فرجلٌ عرفَ - الحقّ فقضَى بهِ فهو فِي الجنةِ ورجلٌ عرفَ الحقَ فلم يقضِ به وجارَ في الحُكمِ فهو في النارِ ورجل لم يَعرِفِ الحق فقضَى للناسِ على جهلٍ فهو للنا ر"ِ

Sidoo kale wuxuu nebigu (NNKH) xaaraam ka dhigay nacladna u yaboohay in garsooruhu ka qaato laaluush ama wax dhaqaale ah labada daraf ee dacwadu ka dhaxayso mid ka mid ah, sida xadiiskaan sheegayo:

”لعن رسولُ الله ﷺ الراشي والمرتشي في الحكم "

Rasuulku (NNKH) wuxuu u magacaabay dhammaan deegaanadii Islaamku gaaray garsooreyaal ku qalabaysan aqoon iyo xirfad garsoor kana madax banaan inta badan siyaasadaha kale ee dowlada, waxaana ka mid ahaa garsooreyaashaas asxaabigii weynaa ee la oran jiray **Mucaad binu Jabal** oo nebigu (NNKH) u magaacbay qaaliga Yaman. Waxaa kale oo ka mid ahaa saxaabigii la oran jiray **Abaan binu Saciid binu Al-Caas,** oo uu nebigu ka dhigay qaaliga Baxrayn iyo garsooreyaal kale oo dhammaantood kala saarayay ummada Islaamka ah dhexdooda, hirgalinayayna cadaaalada, kala dambaynta iyo sareynta sharciga.

Si la mi ah khulafadii nebigu waxay qaadeen wadadii uu Rasuulku u falay, waa kan oo waa **Cumar binu Khadhaab,** wuxuu u dirayaa **Abuu Muusaa Al-Ashcari** oo markaas ahaa qaaliga Yaman kitaab uu ku dhan yahay xeerarka xukunka Islaamiga ah, waana kitaabka saldhiga u ah uguna caansan axkaamta garsoorka ee Islaamka.

Shaki kum jiro in bulso kasta oo addunkaan joogata nolosheedu aysan sinaba u hagaagayn hadaan la helin amni iyo garsoor ku qalabaysan xeerar cad-cad una dhaxeeya dhammaan bulshadaas ilaaliyana xuquuqda Illaahay iyo xuquuda Aadanaha, garsoorkaas oo ay astaan u tahay cadaalada iyo sareynta sharciga kana fog laaluush, nin jeclaysi iyo wax kasta oo cadaalad dara ah.

Garsoorka cadaalada ahi waa tiirka koowaad ee dowladi ku dhisanto, la'aantiisna waxaa la oran karaa wax dowlad la dhoho ma jiri karto.

Nasiib daro manta Soomaalidu mesha ay u dhimanayso waa cadaalad daro iyo garsoor xumo, waxaadna moodaa dowldanimada Soomaalida in garsoorku kaga jiro meesha ugu hooseysa, tusaale ahaan; miisaaniyada loo qoondeeyay garsoorka Soomaaliya waxay ahayd 1% sanadkii 2020 kii. Sidoo kale wuxuu dayac ka jiraa cida loo xulanayo xirfadleyaasha garsoorka. Soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa "Qur'aan Alif ka khaldamay AL baqra kama hagaago".

Hadda dowladnimada garsoorka kasoo khaldantay meel ka saraeysa iyo adeeg kale oo bulsho waa mustaxiil in laga helo. Marka si dalku inoogu hagaago waa in aan dhamaanteen cadaalada dhaqan ka dhigano, si gaar ah waa in la helaa garsoor hufan, madax banaan, aqoona leh kuna dhaqma shareecada Islaamka iyo xeerarkii cajiibka ahaa ee nebigu u dejiyay waaxda garsoorka ee dowlada Islaamka.

## Hagaajintii Nabadda Madiina

Ilaalinta nabaddu waa baahi uu qabo dhammaan aadanuhu, waxayna lagama maarmaan u tahay dhammaan bulshooyinka dunida aan joogno.

Markii la soo diray Rasuulka (NNKH) carabtu waxay u noolaayeen qaab fawdo iyo isdil ah, qofba qofka uu ka xoog badan yahay ayuu dili jiray dhicina jiray, waxaana aad u yaraa isu socodka dadka dhexdiisa ah. Qabiilna qabiilka kale uma gudbi Karin, sida dhul badan oo Soomaalida manta uu yahay oo aan la isugu gudbi karin colaad qabiil darteed. Mana jirin xilligaas carabta dhexdeeda wax nidaam sharci ah oo ay ku midaysan yihiin amaankana usuga, dadkana kala celiya.

Ilaa ay ka dhalatay dowladii Islaamka ee xarunteedu ahayd magaalada Madiina, dowladaas oo yoolkeeda koowaad ka dhigatay sugida amniga. Si amniga loo sugo Islaamku wuxuu la yimid istaraatiijiyad cad oo amniga lagu sugayo, waxaana kamid ahaa istraatiijiyadaas ka hortaga faldambiyeedka iyo hadduu dhaco fal dambiyeedku u ciqaabista cidii gaysatay ciqaab u qalanta dambigaas. Waxaa kale oo ka mid ahaa istaraatiijiyada Islaamka ee amniga lagu sugayay wacyigalinta bulshada iyo ku dhiirigelinta ilaalinta amniga ilaa uu Illaahay isku xiray amniga, cibaadad, iyo dhammaan qaybaha kale ee nolosha, sida Illahay uu ku sheegay Suuratu “**Li’iilaaf”:**

"فليعبدوا رب هذا البيت * الذي أطعمهم من جوع وآمنهم من خوف "

Waxay ka mid tahay mucjisooyinka qur’aanka kariimka ah, wuxuu Allaah ku sheeegay labo aayadood oo yar-yar nolosha adduunka dhamaanteed, haday tahay cibaado, badqabka cuntooyinka iyo amaanka guud ee ummadeed.

Sidoo kale qur'aanku wuxuu isku xiray amniga iyo deganaanshaha dhulka Illaahay iyo maamulkiisaba. Wuxuuna yiri Illaahay:

﴿ وَعَدَ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا مِنكُمْ وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَيَسْتَخْلِفَنَّهُمْ فِي الْأَرْضِ كَمَا اسْتَخْلَفَ الَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ وَلَيُمَكِّنَنَّ لَهُمْ دِينَهُمُ الَّذِي ارْتَضَىٰ لَهُمْ وَلَيُبَدِّلَنَّهُم مِّن بَعْدِ خَوْفِهِمْ أَمْنًا ۚ يَعْبُدُونَنِي لَا يُشْرِكُونَ بِي شَيْئًا ۚ وَمَن كَفَرَ بَعْدَ ذَٰلِكَ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ﴾ النور:55

Cibaadada xajka oo kamid ah shanta tiir ee Islaamka wuxuu Illaahay ku xiray gudashadiisa amni, sida Illaahay ku yiri qur'aankiisa;

﴿ فِيهِ آيَاتٌ بَيِّنَاتٌ مَّقَامُ إِبْرَاهِيمَ ۖ وَمَن دَخَلَهُ كَانَ آمِنًا ۗ وَلِلَّهِ عَلَى النَّاسِ حِجُّ الْبَيْتِ مَنِ اسْتَطَاعَ إِلَيْهِ سَبِيلًا ۚ وَمَن كَفَرَ فَإِنَّ اللَّهَ غَنِيٌّ عَنِ الْعَالَمِينَ﴾ سورة آل عمران:97

Wuxuu kale oo Illaahay isku xiray qofka amnigiisa iyo iimaankiisa, wuxuuna yiri Allaah;

﴿ الَّذِينَ آمَنُوا وَلَمْ يَلْبِسُوا إِيمَانَهُم بِظُلْمٍ أُولَٰئِكَ لَهُمُ الْأَمْنُ وَهُم مُّهْتَدُونَ﴾ الأنعام: 82

In badan Illaahay wuxuu uga qisooday qur'aankiisa kariimka ah ahmiyada amnigu ugu fadhiyay ummadihii hore.

﴿ أَفَأَمِنَ أَهْلُ الْقُرَىٰ أَن يَأْتِيَهُم بَأْسُنَا بَيَاتًا وَهُمْ نَائِمُونَ﴾ سورة الأعراف: 97

﴿ وَضَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا قَرْيَةً كَانَتْ آمِنَةً مُّطْمَئِنَّةً يَأْتِيهَا رِزْقُهَا رَغَدًا مِّن كُلِّ مَكَانٍ فَكَفَرَتْ بِأَنْعُمِ اللَّهِ فَأَذَاقَهَا اللَّهُ لِبَاسَ الْجُوعِ وَالْخَوْفِ بِمَا كَانُوا يَصْنَعُونَ﴾ النحل:112

Intii nebigu (NNKH) halganka uu ugu jiray hagaajinta amniga iyo nabadgelyada wuxuu ugu bishaaraynayay asxaabtiisa inuu hagaagidoono amnigu oo la gaaridoono xilli gabadhu keligeed ay

ka soo safridoonto ciraaq si ay u timaado guriga Illaahay (Kacbada), iyadoo wax Illahay abuurtay aan ka baqayn heerka amaanku gaaray dartiis, laakiin idinku ha sugi waayina xilligaas wuu imaane, ayuu yiri Rasuulku (NNKH);

"فوالله ليوشكن أن تسمع بالمرأة تخرج من القادسية على بعيرها حتى تزور هذا البيت ، لا تخاف"

"والله ليتمن هذا الأمر، حتى يسير الراكب من صنعاء إلى حضرموت لا يخاف إلا الله أو الذ ئب على غنمه، ولكنكم تستعجلون"

Waxaan ka fahmaynaa axaadiistaan in dadkii nebiga (NNKH) la noolaa ay aad ugu hilowsanaayeen inay amni helaan maxaa yeelay waxay ku daaleen amni daro iyo fowdo.

Si amniga loo sugo nebigu wuxu mamnuucay in dadka muslimiinta ahi isku xadgudbaan, wuxuuna faray Rasuulku in qofka muslimka ahi qof ka kale ee walaalkiis ah uu mudnaan siiyo xaq dhowrana oo ay xaaraam ka tahay dhiigiisa, maalkiisa iyo xitaa sharaftiisa. Haddii intaas laga talaabana amnigu faraha ka baxayo oo dadku noqonayaan sidii duul gaala ah oo kale oo wax tixgelin ah aan isa siinayn, madaxana xabad iskala dhacaya, wuxuuna yiri nebigu (CSW) maalintii xajka sagoostiska:

"إنَّ دِماءَكُم، وأمْوالَكم وأعْراضَكُم حرامٌ عَلَيْكُم كَحُرْمة يومِكُم هَذَا، في شهرِكُمْ هَذَا، في بلَدِكُم هَذَا، ألا هَلْ بلَّغْت, ثُمَّ قال: لا تَرجِعوا بَعدي كُفَّارًا، يَضرِبُ بَعضُكُم رِقابَ بَعضٍ."

Wuxuu kale oo uu inoo sheegay nebigu xataa inaysan banaanayn inaad baqdin galiso qof walaalkaa ah oo muslim ah, inaad disho ama dhacdo iskaba daaye. Wuxuuna yiri nebigu (NNKH);

"لا يحل لمسلم أن يروع مسلماً"

Wuxuu kale oo xabiibku (NNKH) xusay in amni la helaa uu la mid yahay nolol adduunyo oo dhammeystiran, wuxuuna yiri Rasuulku (NNKH);

"مَنْ أَصْبَحَ مِنْكُمْ آمِنًا فِي سِرْبِهِ، مُعَافًى فِي جَسَدِهِ، عِنْدَهُ قُوتُ يَوْمِهِ، فَكَأَنَّمَا حِيزَتْ لَهُ الدُّنْيَا "

Ugu dambeyn nebigu (NNKH) wuxuu ku ducayn jiray markasta amniga iyo nabadgelyada, waxaana ka mid ahaa ducooyinkiisii;

" اللهم استر عوراتنا وآمن روعاتنا "

Dowladii Islaamka ee nebi Muxamed (NNKH) ka yagleelay magalada Madiina wuxuu udub dhexaad uga dhigay amniga iyo nabadgelyada. Waxa aan xasuusanaa heshiisyadii Madiina ee saddexda lakab iska saarnaa ee uu nebigu (NNKH) ka hirgaliyay magaalada Madiina markii uu yimidba, heshiisyadaas oo taariikhda ku galay heshiisyadii nabada ee madiina

( معاهدة السلام في المدينة ).

Nebi Muxamed (NNKH) laftiisa ayaa heshiisyadaas kor joogtayn jiray hubina jiray dhaqan galkooda, guud ahaana aminga Madiina isaga ayaa la socon jiray.

In kastoo qur'aanka iyo xadiiskuba si weyn ugu wacyigeliyeen uga dhiirigeliyeen ummada muslimiinta ah in ay amnigooda ilaashadaan kana shaqeeyaan nabadgelyada dalkooda iyo dadkooda, hadana waxaa jira dad aan wacdigu Karin, dhaguhuna u furnayn, waana kuwa ugu badan ee amniga waxyeeleeya. Hadaba Islaamku kama baaqsan inuu u diyaariyo dadka noocaas ah tilaabooyin looga hortagayo laguna xakamaynayo, si aysan u khalkhalgelin amniga guud ee bulshada, tilaabooyinkaasina waa xuduuda Islaamiga ah ama xeerarka ciqaabta ee Islaamka, **sida xeerka ciqaabta ee tuuganimada iyo dhaca, xeerka ciqaabta ee qisaasta, xeerka ciqaabta ee zinada, xeerka ciqaabta ee khamriga, xeerka ciqaabta ee u gafida qofka muslimka ah iyo xeerka ciqaabta ee xawtul dhariiqa.**

Inta badan xeerarkaas ciqaabta ah waxaa la dhaqan geliyay Rasuulka (NNKH) oo nool, sida xeerka tuuganimada oo waa tii gacanta laga jaray gabdhii qureyshiyada ahayd ee reer **Makhzuum** sidaan kusoo marnay xadiiskii Rasuulka ee ahaa;

"لما سرقت المخزومية في مكة يوم الفتح قالوا: مَن يشفع فيها لعلها لا يُقام عليها الحدُّ؟ فطلبوا من أسامة بن زيد مولى الرسول ﷺ أن يتقدَّم، فقال له النبيُّ ﷺ: أتشفع في حدٍّ من حدود الله؟! وغضب عليه الصلاة والسلام، وقال: إنما أهلك مَن كان قبلكم أنَّهم كانوا إذا سرق فيهم الشريفُ تركوه، وإذا سرق فيهم الضعيفُ أقاموا عليه الحدَّ، وايمُ الله، لو أنَّ فاطمة بنت محمدٍ سرقتْ لقطعتُ يدها"

Sidoo kale waxaa la dhaqan geliyay intuu nebigu (NNKH) noolaa xeerka qisaasta oo waxaa la qisaasay dad dad kale dilay sida ku sugan axaadiista Rasuulka (SCW):

" قُتل شاب من المسلمين في خيبر، أقام النبي ﷺ القصاص في القتل، حيث تم إثبات الجريمة والمطالبة بالحق."

Qur'aanka kariimka ah wuxuu Illaahay noogu cadeeyay in qisaastu ay nolol inoo tahay, sida Illaahay ku yiri aayadaan:

﴿ وَلَكُمْ فِي الْقِصَاصِ حَيَاةٌ يَا أُولِي الْأَلْبَابِ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ﴾ البقرة:179

Ka Soomaali ahaan aayadaas si itus oo itaabsii ah ayaan u tijaabinay markaan qisaastii ka tagnay oo ku badelnay mag aan booskeedii joogin, nolosheenii oo dhan ayaa baa ba'day oo waxaan u kala qaybsanay mid u dhintay dil uusan isagu gaysan iyo mid dil u jooge ah oo markii mid jirri ah oo reerkooda ah uu qof dilo isagu u qoolan. Sida Illaahay inoo sheegay hadaynu qaadan lahayn oo aynu dili lahayn qofkii isagu wax dilay waxaa bad-baadi lahaa nafo badan oo manta tegay, waxaana amaan ku noolaan lahaa kuwa baqaya.

Sidoo kale qur'aanku wuxuu meel adag ka istaagay isbaaraystaha (Xawtul dariiqa) waxaana Illaahay uu inoo sheegay qofkii falkaas foosha xun ku dhiirada oo dadka dariiqa maraya dhaca ama laaya in lagu fuliyo xeer ciqaabeedkaan xanuunka badan oo ah in la dilo oo la daldalo hadduu cid dilo ama in gacan iyo lug is dhaaf ah laga jaro hadduu wax dhaco oo uusan wax dilin, waxaana

ciqaabta noocaas ah loo mariyay waa falkaas foosha xun ee uu sameeyay oo bulshada nolosheeda saamaynta xun ku yeelanaya.

Ugu dambayn Rasuulku (NNKH) ogaal uu ogyahay macaanka iyo mudnaanta amnigu leeyahay ayuu wuxuu nabad geliyay oo amaan siiyay dadkii reer Makka ee ayagu geed gaaban iyo geed dheerba u fuulay siday mar u dili lahaayeen nebiga (NNKH), wuxuuna ogeysiis ku bixiyay markuu Makka dib u qabsady nebigu "Qofkii gala guriga **Abuu Sufyaan** waa nabad galayaa, qofkii gurigiisa soo xirtana waa nabad galayaa, qofkii misaajidka galena waa nabad galayaa".

Ahmiyada ay leedahay nabaddu darteed ayuu nebigu (NNKH) markuu Makka furtay wuxuu mamnuucay wax dhiig ah in lagu daadiyo magaalada makka iyo guud ahaan dhulka Islaamka.

## Isbadalkii Dhaqanka Bulsho ee Madiina

Bulshada Madiino waxay ahayd sida dhammaan bulshooyinka carabtu ay ahaayeen bulsho uu hogaanka u hayo jahli, qabyaalad, faquuq, isdil, iyo colaad aan dhamad la hayn. Waana inta bulshada Soomaaliyeed ka dhex jirta manta, malaha weli jaahiligii ayaan joognaa dhaqan ahaan. Bulshadaas qofka waxay ku qiimayn jireen cida uu yahay mana ay u fiirin jirin waxa uu yahay iyo waxa uu ugu fadhiyo bulshada.

Markuu Rasuulku (NNKH) yimid magaalada Madiina wuxuu la yimid akhlaaq ka duwan midii ay barteen oo la qabsadeen carbtii bilaa aqoonta iyo bilaa diinta ahayd, wuxuuna la yimid nebigu (NNKH) dhaqan ku dhisan aqoon iyo naxariis, dhaqan ku dhisan wadniyad iyo walaaltinimo, dhaqan ku dhisan

is-dhexgal iyo midnimo, dhaqan ku dhisan in dadku wada yihiin hal bulsho oo siman oo aan kala maar mayn, qabiil gaar ah iyo beel kaligeed ah aysan meel gaari Karin. Markaas ayuu nebigu (NNKH) ansixiyay oo qalinka ku duugay heshiisyadii, is-dhexgalka iyo wada noolaanshaha ee aan in badan ku soo marnay bogagii hore. Heshiisyadaas oo taariikhda ku galay **Heshiisyadii Nabada ee Madiina** (معاهدة السلام في المدينة).

Intaas wixii ka dambeeyay waxaa si buuxda isu badelay dhaqankii reer Madiina, booskii qabyaalada waxaa galay wadaniyad, is jacayl iyo walaaltinimo. Halkii is xaqirida iyo isyasida waxaa galay isku dooritaan iyo in qofku uu ka hormariyo naftiisa qofka kale ee walaalkiisa muslimka ah ee la nool. Kaalintii colaada iyo dirirtii qabiilkana waxaa buuxshay halganka diinta Illaahay (الجهاد) loo wada galo, iyadoo hal safa lagu wada jiro. Booskii is dhaca iyo is boobidana waxaa badelay is xiriirin iyo bixinta sadaqada, sekada iyo wax kasta oo taageero bulsho ah. Dadkaas waxa saa u badelay waa iimaanka iyo rumaynta dhabta ah ee ay Allah iyo Rasuulkiisa iyo diinta Islaamka u rumeeyeen. Cid kasta oo aan rumeysnayn ama aan dhaqan galin akhlaaqdaas nebigu (NNKH) keenay ee wali uu ka buuxo dhaqankii jaahiliga

ahaa ee qabyaalada, eexda, faquuqa, isdilka iyo colaada aan dhammaadka lahayn wax iimaan ah malaha waana sheegato waxayna galayaan naarta Jahanama, ha tukadeen ama ha soomeen, sida uu inoo sheegay Rasuulkeena suuban:

"مَن دَعا بدَعْوى الجاهِلِيَّةِ فإنَّه مِن جُثَى جَهَنَّمَ"، فقالَ رَجُلٌ: يا رَسولَ اللهِ، وإن صامَ وصلَّى؟ قالَ: "نَعمْ، وإن صامَ وصلَّى، فادْعوا بدَعْوةِ اللهِ الَّذي سَمَّاكم بِها المُسلِمينَ المُؤمِنينَ عِبادَ اللهِ"

Waxaa kale oo Nebigu (NNKH) mamnuucay meeshana ka saaray dhammaan dhaqamadii xumaa ee bulshadii Madiino ku dhaqmi jireen kuwaas oo fitno iyo fad-qalalo ku ahaa nolosha bulshadii reer Madiina. Waxaana ka mid ahaa dhaqamadaas Zinada.

**Zinadu:** waa dhaqan xun oo jaahili ah oo aan ku haboonanyn Bini-aadamka iyo sharaftiisa, wuxuuna baa bi'iyaa nasabiyada iyo abtiriska bulshadu leedahay, wuxuuna keenaa kala fogaansho riximka dhexdiisa ah, wuxuuna wasakheeyaa bulshada, wuxuuna dhaliyaa cuduro halis ku ah nolosha bulshada, waana dhaqankii ay ku baa ba'een kuna tirtirmeen ummadihii hore, ummad kasta oo uu ku bato dhaqankaasu waxaa hubaal ah in ay baa ba'ayso oo aysan sii jiraynin. Sidaas darted nebigu (NNKH) wuxuu la yimid talaabooyin dhab ah oo adag oo si buuxda meesha uga saaraya zinada iyo anshax xumadeeda, wuxuuna marka hore nebigu (NNKH) ka sameeyay zinada wacyigalin aad u badan oo cajiib ah, isagoo adeegsanaya aaydaha Qur'aanka kariimka ah iyo

Xadiiska Rasuulka (SCW). Waxaa Illaahay inaga reebay in loo dhawaado zinada, hade in la sameeyo maahan waxa laynaga reebay ee waa in loo dhawaado sida Illaahay uu ku yiri kitaabkiisa kariimka ah:

﴿ وَلَا تَقْرَبُوا الزِّنَا ۖ إِنَّهُ كَانَ فَاحِشَةً وَسَاءَ سَبِيلًا﴾ سورة الإسراء:32

Macnuhu waxaa weeye ka fogaada waxyaabaha keeni kara zinada sida: fiirinta dumarka gayaanka ah ama in dumarku ay fiiriyaan raga ama in dumarku ay u muujiyaan jirkooda raga ajnabiga ka ah sida Illaahay uu ku leeyahay Qur'aankiisa kariimka ah:

﴿ قُل لِّلْمُؤْمِنِينَ يَغُضُّوا مِنْ أَبْصَارِهِمْ وَيَحْفَظُوا فُرُوجَهُمْ ۚ ذَٰلِكَ أَزْكَىٰ لَهُمْ ۗ إِنَّ اللَّهَ خَبِيرٌ بِمَا يَصْنَعُونَ﴾ النور: 30

﴿ وَقُل لِّلْمُؤْمِنَاتِ يَغْضُضْنَ مِنْ أَبْصَارِهِنَّ وَيَحْفَظْنَ فُرُوجَهُنَّ وَلَا يُبْدِينَ زِينَتَهُنَّ إِلَّا مَا ظَهَرَ مِنْهَا ۖ وَلْيَضْرِبْنَ بِخُمُرِهِنَّ عَلَىٰ جُيُوبِهِنَّ ۖ وَلَا يُبْدِينَ زِينَتَهُنَّ إِلَّا لِبُعُولَتِهِنَّ أَوْ آبَائِهِنَّ أَوْ آبَاءِ بُعُولَتِهِنَّ أَوْ أَبْنَائِهِنَّ أَوْ أَبْنَاءِ بُعُولَتِهِنَّ أَوْ إِخْوَانِهِنَّ أَوْ بَنِي إِخْوَانِهِنَّ أَوْ بَنِي أَخَوَاتِهِنَّ أَوْ نِسَائِهِنَّ أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُهُنَّ أَوِ التَّابِعِينَ غَيْرِ أُولِي الْإِرْبَةِ مِنَ الرِّجَالِ أَوِ الطِّفْلِ الَّذِينَ لَمْ يَظْهَرُوا عَلَىٰ عَوْرَاتِ النِّسَاءِ ۖ وَلَا يَضْرِبْنَ بِأَرْجُلِهِنَّ لِيُعْلَمَ مَا يُخْفِينَ مِن زِينَتِهِنَّ ۚ وَتُوبُوا إِلَى اللَّهِ جَمِيعًا أَيُّهَ الْمُؤْمِنُونَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ﴾ النور:31

Si la mid ah nebigeenu (NNKH) wuxuu ka digay oo xaaram ka dhigay in nin iyo naag an is qabin ay kaligood meel cidla ah wada tagaan, maxaa yeelay waxaa saddex ku noqonaya shaydaanka oo u qurxinaya in ay xumaan sameeyaan sida Rasuulku (NNKH) sheegay: :

" ألا لا يخلون رجل بامرأة إلا كان ثالثهما الشيطان"

Waa ka hortag la yaab leh oo ku tusinaysa sida zinadu ama anshax xumadu ay khatar uga tahay bulsho kasta dhexdeeda. Intaas keliya maahee Islaamku wuxuu ka jideeyay anshax xumada zinada xeerar ciqaabeed ku haboon hadba inta faldambiyeedkaasi le egyahay, sida hadduu zinaysto qof aan guur soo marin in meel fagaare ah oo dadku u wada jeedaan qofkaas la gula dhaco 80 jeedal hal sano oo xabsi ahna la liqsiiyo sida Illaahay kitaabkiisa ku sheegay:

﴿ الزَّانِيَةُ وَالزَّانِي فَاجْلِدُوا كُلَّ وَاحِدٍ مِّنْهُمَا مِائَةَ جَلْدَةٍ ۖ وَلَا تَأْخُذْكُم بِهِمَا رَأْفَةٌ فِي دِينِ اللَّهِ إِن كُنتُمْ تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ۖ وَلْيَشْهَدْ عَذَابَهُمَا طَائِفَةٌ مِّنَ الْمُؤْمِنِينَ﴾ النور:02

Hadduu zinaysto qof reer leh ama guur xalaal ah soo maray waxaa ciqaab Islaamku uga dhigay in dhagax lagu dilo weliba goob fagaare ah oo la wada daawanayo. Waa ciqaab adag oo la marsiiyay qof la yimid dhaqan bulshada dhexdeeda khatar ka ah, waxayna ka hortagaysaa ciqaabtaasi baa ba'a iyo bakhtinta bulsho idil.

Xeer ciqaabeedka zinada waxaa la fuliyay xilligii nebigu (NNKH) noolaa, sida ku cad xadiiskaan saxiixa ah:

عن عبد الله بن عباس أن عمر بن الخطاب صعد منبر النبي ﷺ وقال:«إنَّ اللَّهَ بَعَثَ مُحَمَّدًا ﷺ بالحَقِّ، وأَنْزَلَ عليه الكِتابَ، فكانَ ممَّا أَنْزَلَ اللَّهُ آيَةُ الرَّجْمِ، فَقَرَأْناها وعَقَلْناها ووعَيْناها، رَجَمَ رَسولُ اللَّهِ ﷺ ورَجَمْنا بَعْدَهُ، وأَخْشَى إنْ طالَ بالنَّاسِ زَمانٌ أنْ يَقولَ قائِلٌ: ما نَجِدُ الرَّجْمَ في كِتابِ اللَّهِ، فَيَضِلُّوا بتَرْكِ فَرِيضَةٍ أنْزَلَها اللَّهُ...»

Si looga baaqsado zinada iyo aafaadkeeda Islaamku wuxuu jideeyay guurka oo ah in qofka bini aadamka ah uu baahidiisa si

xalaal ah oo nadiif ah u guto, nebiguna (NNKH) wuxuu dhiirigeliyay in la guursado gaar ahaan dhalinyarada wuxuuna yiri nebigu (NNKH);

"يَا مَعْشَرَ الشَّبَابِ، مَنِ اسْتَطَاعَ مِنْكُمُ الْبَاءَةَ فَلْيَتَزَوَّجْ، فَإِنَّهُ أَغَضُّ لِلْبَصَرِ، وَأَحْصَنُ لِلْفَرْجِ، وَمَنْ لَمْ يَسْتَطِعْ فَعَلَيْهِ بِالصَّوْمِ؛ فَإِنَّهُ لَهُ وِجَاءٌ "

**{Dhalinyaro qofkiinii awoodi kara in uu guursado ha guursado, maxaa yeelay guurka ayaa indhaha ka ilaalinaya xumaanta, qalabkana ka waardiyaynaya xumaanta, qofkii aan awoodin in uu guursado ha soomo, soonka ayaa u ah dhufaan oo kale}.**

Nebigu (NNKH) wuxuu u sameeyay guurka xeerar cajiib ah oo ku dhisan masuuliyad, is ixtiraam, kalgacayl iyo samofal joogta ah, isaga ayaana ku fuliyay xeerarkaas dhammaantood guurkiisii iyo guryihiisii, wuxuuna tusaale u ahaa nebigu (NNKH) qof kasta oo jecel inuu dhaqdo reer xalaal ah oo leh tacab dadeed iyo mid duunyo.

Waxyaabihii xumaanta ahaa ee Rasuulku kala diriray reer Madiina waxaa ka mid ahayd khamrada.

**Khamradu**: waa xumaanta oo dhan hooyadeed, waana dhaqan jaahili ah oo culays weyn ku haya bulsho kasta oo adduunka joogta.

Cabida khamrigu wuxu ka ahaa guud ahaan carabta dhexdeeda iyo gaar ahaan reeer Madiinaba wax ka mid ah noloshooda maalin

laha ah, mana fududayn ama ma suurto galayn in lagu qanciyo bulshadaas xilligas la joogay in khamradu reeban tahay oo aan la cabi Karin. Sidaas darted ayuu Islaamku la yimid xeelad looga guurayo la qabsiga cudurkaan dilaaga ah oo bulshada dhiigooda iyo dhuuxoodaba galay, wuxuuna ku bilaabay inuu bulshada tuso in khamriga dhibkiisu ka badan yahay dheefta ay iyagu ka arkaan sida Illahay kitaabkiisa ku sheegay:

﴿ ۞ يَسْأَلُونَكَ عَنِ الْخَمْرِ وَالْمَيْسِرِ ۖ قُلْ فِيهِمَا إِثْمٌ كَبِيرٌ وَمَنَافِعُ لِلنَّاسِ وَإِثْمُهُمَا أَكْبَرُ مِن نَّفْعِهِمَا ۗ وَيَسْأَلُونَكَ مَاذَا يُنفِقُونَ قُلِ الْعَفْوَ ۗ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ اللَّهُ لَكُمُ الْآيَاتِ لَعَلَّكُمْ تَتَفَكَّرُونَ﴾ سورة البقرة:219

Wuxuuna ku xijiyay in bal ay iska daayaan cabida khamriga marka ay tukanayaan, maadaama uu qofku marka uu khamro cabo uu san kala garanayn waxa uu tukaday iyo wax kale sida Illaahay ku sheegay Qur’aanka kariimka ah:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَقْرَبُوا الصَّلَاةَ وَأَنتُمْ سُكَارَىٰ حَتَّىٰ تَعْلَمُوا مَا تَقُولُونَ وَلَا جُنُبًا إِلَّا عَابِرِي سَبِيلٍ حَتَّىٰ تَغْتَسِلُوا ۚ وَإِن كُنتُم مَّرْضَىٰ أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ أَوْ جَاءَ أَحَدٌ مِّنكُم مِّنَ الْغَائِطِ أَوْ لَامَسْتُمُ النِّسَاءَ فَلَمْ تَجِدُوا مَاءً فَتَيَمَّمُوا صَعِيدًا طَيِّبًا فَامْسَحُوا بِوُجُوهِكُمْ وَأَيْدِيكُمْ ۗ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَفُوًّا غَفُورًا﴾ النساء: 43

Ugu dambayn markii bulshada intii ugu badnayd ay dareentay in cabida khamrigu dhib mooyee dheefi ka dheertahay ayuu Allaah si buuxda u xarimay khamriga iyo turubkaba, wuxuuna sheegay in ay yihiin shaqo ibliisku bini-aadamka ku lumiyo, oo ay khasab tahay in laga dheeraado, si guul aduun iyo mid aakhiraba loo gaaro, wuxuuna yiri Allaah:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنَّمَا الْخَمْرُ وَالْمَيْسِرُ وَالْأَنصَابُ وَالْأَزْلَامُ رِجْسٌ مِّنْ عَمَلِ الشَّيْطَانِ فَاجْتَنِبُوهُ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ﴾

المائدة:90

Waa hab xumaan ka fujin ah oo cajiib ah oo ku dheehan heerka ugu saraysa ee xikmadeed, waana cashar muhiim ah oo ina baraya saraynta diinteena Islaamka iyo in ay la jaan qaadayso markasta iyo heerka wacyi ee bulshooyinka, waana diintii Illaahay oo isagu abuuray adoomaha loogu talagalay ku dhaqanka diintaan. Intaas ka dib Islaamku wuxuu ka jideeyay cabida khamriga xad lagu xakamaynayo qof kasta oo ku xadgudba xukunka Illaahay ee ah khamradu inay xaaraam tahay, xadkaas oo ka bilowda ciqaabta 40 jeedal ilaa 80 jeedal in lagu dhufto qofkii caadaysta khamrada cabideeda, sida ku taalay xadiiskii Muslimka:

روى الإمام مسلم عن أنس بن مالك رضي الله عنه: "أن النبي ﷺ أُتِيَ برجل قد شرب الخمر، فجلده بجريدتين نحو أربعين"

Isku dhafka xeer ciqaabeedkaan iyo xukunkii khamradu waa xoog iyo xeelad isku milan oo shareecada Islaamku ay ku xakamaynayso xumaanta cabida khamrigu ku reebayo nolosha bulshooyinka dunida.

## Akhlaaqda Islaamka

Shareeca kasta oo adduunka soo martay waxay lahayd aasaas iyo saldhig, ummad walba oo caalamkaan ku noolaydna waxay lahayd tiirar iyo mabaadi’ ay la noolayd.

Shareecada Islaamak iyo ummadeedaba waxaa asaas iyo saldhig u ah akhlaaqda iyo dhaqanka suuban, mana aha akhlaaqda Islaamku doorasho uu qofkii raba ku dhaqmayo kii kalena uu iska dayn karo, mana aha wax dadku kala qaybsanayaan oo qofba qayb kaga dhaqmayo qaybna iska dayn karo, mana aha xadaarad mar la soo maray oo laga gudbay ee waa astaanta diintaan Islaamka, waana amarkii Illaahay iyo Rasuulkiisa suuban, xataa maaha akhlaaqda Islaamku waajib uu gudanayo hal qof ee waa dhaqan ku fidsan dhammaan bulshada wada degan qof ahaan iyo qolo ahaanba.

In ay dhisanto oo ay hagaagto akhlaaqda qofeed iyo tan ummadeedba waa ujeedkii Illaahay usoo diray Rasuulkeena Muxamed (NNKH) sida uu isaguba ku sheegay xadiiskaan;

"إنما بعثت لأتمم مكارم الأخلاق"

**{Waxaa la ii soo diray in aan dhammaystiro dhaqamada wanaagsan }**

# 1. Isku-xirnaanshaha Bulshada iyo Iscaawinteeda(التعاون)

Diinta Islaamku waxa ay dadkeeda fartay inay isku xirnaadaan oo ay iskaashadaan si gaar ah dadka ehelka ah iyo qaraabada in la xiriiriyo oo loo wanaag sameeyo, wuxuuna Allaah ku daray oo uu raaciyay wanaag usamaynta ehelka iyo qaraabada, tawxiidka Illaahay iyo cadaalada sida uu ku yiri Allaah qur'aankiisa:

﴿ ۞ إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَانِ وَإِيتَاءِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَيَنْهَىٰ عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنكَرِ وَالْبَغْيِ ۚ يَعِظُكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ﴾ النحل:90

Wuxuuba ka dhigay Allaah baari ahaanshaha waalidka mid ku xiga caabudidiisa, wuxuuna yiri:

﴿ ۞ وَقَضَىٰ رَبُّكَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا ۚ إِمَّا يَبْلُغَنَّ عِندَكَ الْكِبَرَ أَحَدُهُمَا أَوْ كِلَاهُمَا فَلَا تَقُل لَّهُمَا أُفٍّ وَلَا تَنْهَرْهُمَا وَقُل لَّهُمَا قَوْلًا كَرِيمًا﴾ الإسراء: 23

Sidoo kale isku xirnaanshaha iyo isuwanaagsanaanta deriska ayaa ah wax lagama maarmaan ah oo shareecadeena Islaamku ay waajib diini ah ka dhigtay sida uu Allaah inagu barayo kitaabkiisa:

﴿ ۞ وَاعْبُدُوا اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا ۖ وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا وَبِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسَاكِينِ وَالْجَارِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَالْجَارِ الْجُنُبِ وَالصَّاحِبِ بِالْجَنبِ وَابْنِ السَّبِيلِ وَمَا مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ ۗ إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ مَن كَانَ مُخْتَالًا فَخُورًا﴾ النساء:36

Rasuulkuna uu ku sheegay axaadiis badan waxaana ka mid ah xadiiskaan:

"ما زال جبريلُ يوصيني بالجارِ، حتى ظننتُ أنه سيورِّثُه"

**{Malaku Jibriil igama dayn in uu igala dardaarmayo deriska ilaaba aan ka mooday inuu orandoono derisku ha is dhaxleen}.**

Wuxuuna isku xiray Rasuulku (NNKH) rumaynta Illaahay iyo wanaajinta deriska oo qofkii dersika aan wanaajin Allaahna ma rumeysna sida uu Rasuulku ku dhaartay saddex jeer:

"واللَّهِ لا يُؤْمِنُ، واللَّهِ لا يُؤْمِنُ، واللَّهِ لا يُؤْمِنُ، قِيلَ: مَنْ يا رسولَ اللَّهِ؟ قَالَ: الَّذي لا يأْمنُ جارُهُ بَوَائِقَهُ" مُتَّفَقٌ عَلَيهِ

Waxaa astaan u ah isku xirnaanshaha bulsho inay is caawiyaan oo markasta oo ay bulshadu is caawinayso waa ay isku xiran tahay waana waajib diini ah in bulsho kasta oo wada nool ay iska kaalmaystaan iskuna caawiyaan wax kasta oo wanaag ah, iskana fogeeyaan, iskana kaashadaan la dirirka wax kasta oo xumaan ah oo diintooda iyo dadkooda iyo dalkoodaba wax dhimaal u leh sida Allaah kitaabkiisa ku sheegay:

﴿ وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَىٰ ۖ وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ ۚ وَاتَّقُوا اللَّهَ ۖ إِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ﴾ المائدة:02

## 2. Isku Samirka Bulsho(الصبر)

Si bulshadu u wada noolaato, isu jeclaato, isuna caawiso oo aysan u kala daadan waxaa lagama maarmaan ah in bulshadaasu ay isku dulqaadato iskuguna samirto khaladaadka ka dhacaya qofka ama qolada.

Samirka iyo dulqaadku waa waxa ugu wayn ee uu Allaah ku arsaaqo adoomihiisa waana dhaqamada uu Illaahay ugu jecel yahay inay ku tilmaanaadan adoomihiisu, sida uu Rasuulku (NNKH) ku sheegay xadiiskaan:

"إنَّ فيك خصلتين يحبهما الله: الحلم والأناة "

**{Waxaad leedahay labo tilmaamood oo Illaahay jecel yahay waana dulqaadka iyo deganaanta}**

Waxaa hubaal ah in markasta aadanuhu isku xadgudbayo, maxaa yeelay dabeecada bini aadamka waxaa ku abuuran dulmiga iyo ku xadgudubka dadka kale ee la siman. Xalka ugu dhow uguna fiican, Illaahay agtiisana abaal looga helayo waa in ay is cafiyaan oo isa saamaxaan dadku marka ay isku xadgudbaan iyada oo uu xaq u leeyahay qofka lagu xadgudbay in uu kaga aargoosto kii ku xadgudbay in le eg intii uu u geystay, hadana Illaahay agtiisa waxaa ka wanaagsan inuu iska cafiyo sida Allaah uu ku leeyahay kitaabkiisa qur'aanka ah:

﴿ وَجَزَاءُ سَيِّئَةٍ سَيِّئَةٌ مِّثْلُهَا ۖ فَمَنْ عَفَا وَأَصْلَحَ فَأَجْرُهُ عَلَى اللَّهِ ۚ إِنَّهُ لَا يُحِبُّ الظَّالِمِينَ﴾

سورة الشورى:40

Waxaa ka sii sareeya cafiskaas in aad xumaantii lagugu sameeyay adigu wanaag ku badesho oo qofkii ku xumeeyay aadba wanaajiso, sida Allaah kitaabkiisa cajiibka ah inagu baray:

﴿ وَلَا تَسْتَوِي الْحَسَنَةُ وَلَا السَّيِّئَةُ ۚ ادْفَعْ بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ فَإِذَا الَّذِي بَيْنَكَ وَبَيْنَهُ عَدَاوَةٌ كَأَنَّهُ وَلِيٌّ حَمِيمٌ﴾ فصلت:34

## 3. Sinaanta Bulshada(العدل والمساواة)

Sinaanshaha bulsho waa dhaqan Islaami ah oo sare oo lagama maarmaan u ah wada noolaanshaha bulsho kasta oo adduunka joogta, la’aantiisna waxaa ka dhasha is-faquuq iyo is-xaqirid.Nabigeenuna (NNKH) wuxuu si cad oo aan caad saarnayn u sheegay in dadku wada siman yihiin sida shanlada ilkaheedu u siman yihiin, waxa lagu kala sareyn karana keliya ay tahay cabsida Alle iyo u dhawaanshihiisa, sida laga sheegay nebigu (NNKH) inuu ku yiri xadiiskaan:

"الناس مستوون كأسنان المشط، ليس لأحد على أحد فضل إلا بتقوى الله"

Allaah wuxuu qur’aankiisa ku yiri: “Dadka rumeysan Illaahay iyo Rasuulkiisa uma banaana inay qolo qolo kale xaqirto ama yasto, waxaana dhici karta in qolada la xaqirayo ay kaga fiican tahay qolada wax xaqiraysa Illaahay agtiis”:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا يَسْخَرْ قَوْمٌ مِنْ قَوْمٍ عَسَى أَنْ يَكُونُوا خَيْرًا مِنْهُمْ وَلَا نِسَاءٌ مِنْ نِسَاءٍ عَسَى أَنْ يَكُنَّ خَيْرًا مِنْهُنَّ وَلَا تَلْمِزُوا أَنْفُسَكُمْ وَلَا تَنَابَزُوا بِالْأَلْقَابِ بِئْسَ الِاسْمُ الْفُسُوقُ بَعْدَ الْإِيمَانِ وَمَنْ لَمْ يَتُبْ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴾ الحجرات: 11

Waxaa kale oo Illaahay kitaabkiisa inagu farayaa in xitaa aan ka fogaano malaha xun ee aan walaalaheena kale ka qabi karno oo uusan qofna qofka kale ee walaalkiis ah ka aaminin waxaan ka ahayn wanaag iyo fiicnaan, haddii uu ku arko wax xunna uu ka waaniyo oo uga nasteexeeyo si dabacsan oo aysan xaqiridi la socon, sida Illaahay uu ku sheegay kitaabkiisa:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اجْتَنِبُوا كَثِيرًا مِّنَ الظَّنِّ إِنَّ بَعْضَ الظَّنِّ إِثْمٌ ۖ وَلَا تَجَسَّسُوا وَلَا يَغْتَب بَّعْضُكُم بَعْضًا ۚ أَيُحِبُّ أَحَدُكُمْ أَن يَأْكُلَ لَحْمَ أَخِيهِ مَيْتًا فَكَرِهْتُمُوهُ ۚ وَاتَّقُوا اللَّهَ ۚ إِنَّ اللَّهَ تَوَّابٌ رَّحِيمٌ﴾ الحجرات:12

## 4. Kibirka iyo Isla-weynanka(الكبر والإستعلاء)

Kibirka iyo isla-weynankuba waa sifooyin uusan marnaba xaq u lahayn qofka bini aadamka ah, waana axmaqnimo in qofku is aaminsiiyo  in dadka kale uu wax dheer yahay, Illaahayna wuxuu ka xarimay janadiisa qof kasta oo wax yar oo kibir ah qalbigiisa ku jiro, sida Rasuulku sheegay:

" لَا يَدْخُلُ الجَنَّةَ مَنْ كَانَ فِي قَلْبِهِ مِثْقَالُ ذَرَّةٍ مِنْ كِبْر "

Illaahay wuxuu ka la xaamadaa qalbigiisa qof kasta oo kibraani ah, sidaas darteed waa inaan dadka kula dhaqanaa dabacsanaan, tawaaduc, la mid noqosho iyo waji furnaan, waxaana ku helaynaa sidaas sareynta adduunka iyo Janada aakhiro, sida uu inoo sheegay Rasuulku (SCW): (وَمَا تَوَاضَعَ أَحَدٌ لِلَّهِ إِلَّا رَفَعَهُ اللَّه)

Islaamku wuxuu u taagan yahay markasta hagaajinta bulshooyinka, wuxuuna kasoo horjeedaa wax kasta oo bulshada iyo deegaankeedaba wax u dhimaya, sida Illaahay ku sheegay kitaabkiisa kariimka ah:

﴿ وَلَا تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَاحِهَا وَادْعُوهُ خَوْفًا وَطَمَعًا ۚ إِنَّ رَحْمَتَ اللَّهِ قَرِيبٌ مِّنَ الْمُحْسِنِينَ﴾ سورة الأعراف:56

## 5. Isu nasteexaynta iyo Isla-talinta ( النصيحة)

Nasteexada iyo isla-talintu waa udub dhexaadka diinta Islaamka, waana ujeedada ugu weyn ee Illaahay diintaan Islaamka usoo dajiyay sida nebigeenu(NNKH) inoo sheegay;

قال ﷺ: "الدين النصيحة "

Dhammaan nebiyadii Illaahay soo diray waxay la talinayeen una nasteexaynayeen ummadihii loo soo diray sida Illaahy ku sheegay qur'aankiisa isagoo ka waramaya nebiyaal door ah in ay ku dhaheen ummadahoodii:

{أُبَلِّغُكُمْ رِسَالَاتِ رَبِّي وَأَنَا لَكُمْ نَاصِحٌ أَمِينٌ} سورة الأعراف:68

**{Waxaan idin soo gaarsiiyay fariimihii Illaahay idiin soo diray waxaanan idiin ahay anigu la taliye daacad ah }**

Nasteexada macneheedu waa inaad kala taliso walaalkaaga muslimka ah wax kasta oo xumaan ku ah diintiisa, dantiisa,

dadkiisa iyo dalkiisa, oo aad ku aragtay isago oo faraha kula jira weliba si dabacsan oo daacadnimo ah. Si la mid ah wixii wanaag u ah waa inaad kula talisaa samayntooda, nasteexadu markaas waxay noqonaysaa in qofku dadka kale la jeclaado wanaaga xumaantana uu la noco isagoo waliba u sheegaya oo ugu nasteexaynaya dadka kale arrintaas.

Nebigeenu (NNKH) wuxuu u kala qaybiyay nasteexada shan(5) qaybood oo kala ah:

1. **Nasteexada Illaahay:** oo macneheedu yahay in Allaah la rumeeyo, loo caabudo si dacad ah oo khaalis ah iyo in la qaato amarkiisa intii awood ah lagana haro wixii uu reebo dhammaan tood.
2. **Nasteexada kitaabka Illaahay:** ayaduna waa barashada kitaabka Illaahay, baridiisa, akhrintiisa, ufiirsiga macnihiisa, iyo ku camal falka axkaamtiisa xalaal iyo xaaraamba.
3. **Nasteexada Rasuulka Illaahay:** oo ah in la rumeeyo Rasuulka Illaahay, loona dhega nuglaado lana qaato dhammaan wax kasta oo uu soo gudbiyo, la jeclaado oo loo hiiliyo isaga iyo diintiisaba.
4. **Nasteexaynta madaxda muslimiinta:** waa in lagula taliyo wanaaga, laguna garab istaago wixii xaq ah, loo dhega nuglaado oo la qaato amarkooda, lagana hor imaanin hadaysan wax xumaan ah oo diinta Islaamka lid ku ah aysan faraynin, sidoo kale waxaa ka mid ah nasteexada madaxda in la gala taliyo wax kasta oo dhib u keenaya diinta, dadka, iyo

dalkaba. Waxaa kale oo ka mid ah unasteexaynta madaxda in markasta loogu duceeyo inuu Illahay waafajiyo wixii danta, dadka, dalka iyo diinta Islaamkuba ay ku jiraan.

5. **Unasteexaynta bulsho-weynta muslimiinta:** waxayna noqonaysaa kula talintooda iyo ku toosintooda wax kasta oo dantoodu ku jirto, kooda jaahilka ah oo wax la baro, kooda baahan oo la caawiyo, kooda xumaanta ku dhexjira in laga soo qabto oo lagula taliyo iska daynta xumaantaas iyo kooda ka gaabiya waajibkii saarnaa in la tuso oo loo sheego inuu guto waajibkiisa, wuxuuna yiri Rasuulku (NNKH):

**قال النبي صلى الله عليه وسلم : ( الدين النصيحة ثلاثا , قلنا : لمن يا رسول الله ؟ قال : لله ولكتابه ولرسوله ولأئمة المسلمين وعامَّتهم)**

Intaas oo dhan waxaa loo fulinayaa hab dabacsan, qabow oo xikmadi ku dheehan tahay oo aan lahayn ceebayn iyo colaadin toona sida Illaahay uu kitaabkiisa inoogu sheegay:

﴿ ادْعُ إِلَىٰ سَبِيلِ رَبِّكَ بِالْحِكْمَةِ وَالْمَوْعِظَةِ الْحَسَنَةِ ۖ وَجَادِلْهُم بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ ۚ إِنَّ رَبَّكَ هُوَ أَعْلَمُ بِمَن ضَلَّ عَن سَبِيلِهِ ۖ وَهُوَ أَعْلَمُ بِالْمُهْتَدِينَ﴾ سورة النحل:125

## A) Aadaabta Nasteexaynta iyo Isla-talinta

Si loo gaaro faa’iidada weyn ee nasteexada iyo isla-talintu ay bulshada u leedahay waa in la dhawro aadaabteeda sida:

**B. Daacadnimada:** waa in si daacadnimo ah loo la taliyo qofka ay wax ka qaldan yihin, uu na u muujiyo qofka wax la talinaya jacylka uu u qabo qofka uu la talinayo iyo in ay noqoto la talintu mid Illaahay dartiis ah

**T. Qarsoodi:** isu nasteexaynta iyo isla-talintu waa in ay noqdaan hab qarsoodi ah oo qofka wax ka khaldameen si hoose oo aan dadka kale la ogaysiinayn loogu sheegaa waxa ka khaldan iyo waxa laga rabo inuu ka soo dhalaalo, maxaa yeelay la talinta iyo nasteexaynta lagu soo gudbiyo dadka dhexdooda waxay noqonaysaa ceebayn iyo fadeexadayn.

**J. Dabacsanaan iyo Xikmad:** waa in qofka wax u nasteexaynaya uu si qabow oo xikmadi ku dheehan tahay usoo gudbiyaa nasteexadiisa iyo taladiisa sida Illahay uu ku amaanay nebigiisa (NNKH) dabacsanaanta iyo naxariista uu kula dhaqmayay ummadii uu diinta gaarsiinayay, sida Allaah uu ku sheegayo kitaabiisa:

﴿ فَبِمَا رَحْمَةٍ مِّنَ اللَّهِ لِنتَ لَهُمْ ۖ وَلَوْ كُنتَ فَظًّا غَلِيظَ الْقَلْبِ لَانفَضُّوا مِنْ حَوْلِكَ ۖ فَاعْفُ عَنْهُمْ وَاسْتَغْفِرْ لَهُمْ وَشَاوِرْهُمْ فِي الْأَمْرِ ۖ فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ ۚ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَوَكِّلِينَ﴾ آل عمران:159

Ugu dambayn, qaadashada nasteexada iyo talada wanaagsani waxay ka mid tahay astaamaha lagu garto iimaanka qofka muslimka ah, waana inuu qofku umahad celiyaa qof kasta oo walaalkiis ah oo xumaantiisa usoo gudbiya inta aysan xumaantiisu dadka kale gaarin.

## 6. Daacadnimada (الإخلاص)

Ikhlaaska ama daacadnimadu waa waxa saldhiga u ah in laga aqbalo camalka qofka xagga Illaahay iyo xagga bini aadamkaba, waana waxa ugu weyn ee sababta u noqda in bulshooyinku hagaagaan. Ikhlaaska: macnihiisuna waa in qofku shaqada uu qabanayo ujeedka uu ka leeyahy oo dhan uu yahay Illahay dartiis iyo waxtarka bulshadiisa ee uusan ula jeedin camalkaas ha lagaa sheego iyo dadku ha kugu amaanaan ama ha lagugu jeclaado ama in uu caan ku noqdo iyo wax kasta oo aan ka ahayn Allaah dartiis.

Sidaas darteed ikhlaasku waa dhuuxa acmaasha bini aadamka, waana waxa barakeeya shaqooyinka ay qabtaan aadanuhu oo kala saramariya waana shayga keli ah ee damaanad u ah in camalkaasi uu mira dhalo.

Allaah wuxuu kitaabkiisa inagu faray in dhamaan shaqooyinka aan qabanayno aan ka dhigno kuwo daacad ah oo Illaahay dartiis ah, wuxuuna yiri Alle wayne (SWT):

﴿ وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ حُنَفَاءَ وَيُقِيمُوا الصَّلَاةَ وَيُؤْتُوا الزَّكَاةَ ۚ وَذَٰلِكَ دِينُ الْقَيِّمَةِ﴾ البينة: 5

Rasuulkuna wuxuu ikhlaaska ku tilmaamay nuxurka diinta Islaamka wuxuuna yiri:

(أَخْلِصْ دِينَكَ؛ يَكْفِكَ القَلِيلُ مِنَ العَمَلِ)

**{Daacad ka noqo dhaqankaaga, waxaa kugu filan wax yar oo aad qabato }**

Wuxuu kale oo sheegay nebigu (NNKH) in ikhlaasku (daacadnimadu) uu yahay waxa keli ah ee qofku kaga badbaadi karo shirkiga (la wadaajinta Allaah cid kale), wuxuuna ku yiri xadiisul qudsi " Illaahay wuxuu ina leeyahay anigu cidna wax lama wadaago, qofkii cid kale wax ila wadaajiya ciddaas ayaan u daynayaa wuxuu ila wadaajiyay"

قال رسول الله ـ صلى الله عليه وسلم ـ : قال الله تبارك وتعالى : ( أنا أغنى الشركاء عن الشرك ، من عمل عملا أشرك فيه معي غيري تركته وشركه ) رواه مسلم

Ikhlaaskuna waa meesha Allaah ka fiiriyo adoomihiisa iyo camalkoodaba siduu Rasuulku (NNKH) sheegay:

"إنَّ الله لا ينظر إلى صوركم، ولا إلى أموالكم، ولكن ينظر إلى قلوبكم وأعمالكم"

**{Illaahay idinka eegimaayo muuqaalkiina iyo xoolihiina ee wuxuu idinka eegayaa qalbigiina daacada ku jirta iyo camalkiina khaaliska ah}.**

Ugu dambeyn waa in daacadnimadu iyo ikhlaasku inoo noqdaan waxa keli ah ee inagu hagaya oo inoo diraya shaqo kasta oo aan qabanayno mid adduun iyo mid aakhiraba.

# 7. Run sheegida (الصدق)

Runtu waxay ka mid tahay tilmaamaha ugu sareeya ee bini aadamku uu yeesho, waxaaba la oran karaa waa sifada ugu qiimaha badan ee qof bini aadam ah uu ku tilmaanaado, waana tiirka koowaad ee ay ku taagan tahay qofka noloshiisa qiimaha leh, waana waxa ugu weyn ee isku xira hagaajiyana xiriirka bulshada dhexdeeda ah, sidaas darteed Islaamku wuxuu aad u dhiirigeliyay in runta la joogteeyo beentana laga dheeraado, wuxuuna Illaahay u balan qaaday dadka runta sheega janadiisa sare, sida Illaahay ku sheegay kitaabkiisa:

(قُلۡ أَؤُنَبِّئُكُم بِخَيۡرٖ مِّن ذَٰلِكُمۡۖ لِلَّذِينَ ٱتَّقَوۡاْ عِندَ رَبِّهِمۡ جَنَّٰتٞ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا وَأَزۡوَٰجٞ مُّطَهَّرَةٞ وَرِضۡوَٰنٞ مِّنَ ٱللَّهِۗ وَٱللَّهُ بَصِيرُۢ بِٱلۡعِبَادِ * ٱلَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَآ إِنَّنَآ ءَامَنَّا فَٱغۡفِرۡ لَنَا ذُنُوبَنَا وَقِنَا عَذَابَ ٱلنَّارِ * ٱلصَّٰبِرِينَ وَٱلصَّٰدِقِينَ...) آل عمران : 15-17

(قَالَ ٱللَّهُ هَٰذَا يَوۡمُ يَنفَعُ ٱلصَّٰدِقِينَ صِدۡقُهُمۡۚ لَهُمۡ جَنَّٰتٞ تَجۡرِي مِن تَحۡتِهَا ٱلۡأَنۡهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدٗاۖ رَّضِيَ ٱللَّهُ عَنۡهُمۡ وَرَضُواْ عَنۡهُۚ ذَٰلِكَ ٱلۡفَوۡزُ ٱلۡعَظِيمُ} المائدة : 119

Sidoo kale runta waxaa ku soo arooray axaadiis fara badan oo uu Rasuulku kaga hadlay qiimaha ay runtu leedahay iyo xumaanta ay beentu leedahay, waxaana ka mid ah xadiiskaan:

"عَلَيْكُمْ بِالصِّدْقِ، فَإِنَّ الصِّدْقَ يَهْدِي إِلَى الْبِرِّ، وَإِنَّ الْبِرَّ يَهْدِي إِلَى الْجَنَّةِ، وَمَا يَزَالُ الرَّجُلُ يَصْدُقُ وَيَتَحَرَّى الصِّدْقَ حَتَّى يُكْتَبَ عِنْدَ اللَّهِ صِدِّيقًا، وَإِيَّاكُمْ وَالْكَذِبَ، فَإِنَّ الْكَذِبَ يَهْدِي إِلَى الْفُجُورِ، وَإِنَّ الْفُجُورَ يَهْدِي إِلَى النَّارِ، وَمَا يَزَالُ الرَّجُلُ يَكْذِبُ حَتَّى يُكْتَبَ عِنْدَ اللَّهِ كَذَّابًا" رواه البخاري

**{Ku dedaala runta maxaa yeelay runtu waxay idinku hagaysaa waxa wanaaga ah, wanaaguna wuxuu idin gaynayaa janada Illaahay, qofkii mar walba sheega runta oo ku dedaala waxaa looga qorayaa Illaahay agtiisa runlow, iska ilaaliya beenta maxaa yeelay beentu waxay idinku hagaysaa faajirnimada iyo dhaqan xumada, faajirnimaduna waxay idin gaynaysaa naarta Illaahy, qofkii beenta ku dedaala oo mar walba beenta sheega Illaahay agtiisa waxaa looga qorayaa beenlow}**

Nebigu (NNKH) wuxuu ka digay aadna u dhaliilay beenta ilaa uu sheegay nebigu (NNKH) in uusan marnaba noqon qofka mu'minka ah beenlow.

عن صفوان بن سُليم رضي الله عنه : " أن النبي صلى الله عليه وسلم سُئل : أيكون المؤمن جباناً ؟ قال : ( نعم ) ، ثم سُئل: أيكون المؤمن بخيلاً ؟ قال : ( نعم ) ، ثم سُئل: أيكون المؤمن كذاباً؟ قال : ( لا)".

Runta macnaheedu waa in qofka hadalkiisa iyo ficilkiisuba ay yihiin kuwo dhab ah oo xaqiiqda ku qotoma. Qofka runlowga ah markasta dhaqankiisu wuxuu ku salaysan yahay xaqiiqda iyo dhabta, wuxuuna iska ilaaliyaa wax kasta oo aan sugnayn ama

aan la hubin in uu ku hadlo, sidoo kale qofka runlowga ah waxa uu qabanayo wuxuu u qabtaa si dhab ah oo dhammaystiran mana kala dhimo shaqadiisa sida Rasuulku (NNKH) ku sheegay xadiiskaan;

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم "إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ إِذَا عَمِلَ أَحَدُكُمْ عَمَلًا أَنْ يُتْقِنَهُ".

**{Allaah wuxuu jecel yahay haddii uu qofkiin qabanayo shaqo inuu uqabto si dhab ah oo dhammaystiran}.**

## A) Faa'iidada Runtu u Leedahay Qofka iyo Bulshada

**Qofka:** runtu qofka waxay ka dhigtaa mid lagu kalsoonaan karo bulshadiisa dhexdeeda.

- Runtu waxay kor u qaadaa sharafta iyo karaamada qofku ku dhex leeyahay dadkiisa
- Runtu waxay qofka siisaa xasilooni iyo deganaansho nafsi ah, qofka runlowga ahna kama walwalo hadal ama ficil ka dhacay maxaa yeelay dhaqankiisuba wuxuu ku salaysan yahay dhabta iyo xaqiiqda
- Runtu waxay ka caawisaa qofka in uu ku dhex yeesho bushada uu la nool yahay ixtiraam iyo qaymayn akhlaaqdiisa wanaagsan darteed
- Runtu waxay u horseedaa qofkeeda guul iyo ka gungaarida yoolashiisa.

**Bulshada:** runtu waxay xoojisa xiriirka iyo kalsoonida dadka dhexdooda ah, beentuna waxay kala daadisaa oo ay wiiqdaa xiriirka iyo kalsoonida dadka ka dhaxaysa.

- Runtu waxay kobcisaa cadaalada iyo wada noolaanshaha wanaagsan ee bulsho, waxayna yaraysaa khilaafaadka, colaadaha iyo isku dhacyada dadka dhex mara
- Runtu waxay ka qayb qaadataa horumarka iyo nabada bulshooyinka, beentuna waxay abuurtaa dib u dhaca iyo colaadaha bulshada dhexdeeda ah
- Runtu waxay dhistaa bulsho daacad ah oo isku duuban.

Gunaanad: Runtu waa tiir muhiim u ah nolosha qofka iyo horumarka bulshada, maadaam ay dhisayso cadaalada iyo wada jirka bulshada dhexdeeda ah. Qofka muslimka ahi waa in uu markasta ku dedaalaa sheegida runta kana dheeraada sheegida beenta si la mid ah shaqooyinkiisu waa in ay yihiin kuwo run ah oo dhab ah oo ka dheer dhayal iyo kala dhimanaan.

# 8. Xishoodka (الحياء)

Xishoodku waa dareen qofka ka celinaya inuu sameeyo falalka xun-xun ama ceebta ah, kuna dhiirigelinaya dhaqamada wanaagsan,waana mid ka mid ah astaamaha ugu muhiimsan ee diinta Islaamka. Xishoodka waxaa loo arkaa laan ka mid ah laamaha iimaanka sida uu nebigu (NNKH) sheegay:

"الإيمان بضع وسبعون أو بضع وستون شعبة فأفضلها قول لا إله إلا الله، وأدناها إماطة الأذى عنِ الطَّريق، والحياء شعبة من الإيمان" رواه مسلم

**{Iimaanku waa dhawr iyo toddobaatan laamood waxaana ugu sareysa kalmada لا أله إلا الله, waxaana ugu hooseysa wadada oo qashinka laga fogeeyo, xishoodkuna waa laan ka mid ah laamaha iimaanka}.**

## A) Faa'iidooyinka Xishoodka

1. Xishoodku waa furaha wanaag kasta oo uu qofku rabo inuu gaaro sida Rasuulku (CSW) inoogu sheegay xadiiskaan:
«الحياء كلُّه خيرٌ» رواه مسلم
2. Xishoodku waa lammaanka iimaanka oo qofka muslimka ah iimaankiisu dhab ma noqonayo ilaa uu ka noqdo qof ka

xishooda waxyaabaha xun  ee ceebta ah sida Rasuulku (NNKH) inoo tilmaamay:

«إنَّ الحياء والإيمان قرنا جميعًا فإذا رفع أحدهما رفع الآخر»

3. Xishoodku waa quruxda ugu sareysa ee qof bini aadam ah uu yeesho, xishood la’aantuna  waa foolxumada ugu weyn ee qofi ku tilmaanaado sida nebi Muxamed (NNKH) uu ku yiri xadiiskaan:

   «ما كان الفحش في شيء إلا شانه، وما كان الحياء في شيء إلا زانه»

   Hadal kasta iyo ficil kasta oo xishood la socdo wuu qurxiyaa wuuna hagaajiyaa, wax kasta oo xishood la’aantu ay la socotana way foolxumaadaan waxayna soo jiidaan ceeb maxaa yeelay xishoodku waa furaha wanaag kasta, xishood la’aantuna waa furaha xumaan kasta.

4. Xishoodku waa dhaqan Illaaahay jecel yahay sida Rasuulkeenu ina baray.

   عن أشج عبد القيس -رضي الله عنه- قال: قال لي النَّبيُّ -صلَّى الله عليه وسلَّم-: «إنَّ فيك لخلقين يحبهما الله» قلت: وما هما يا رسول الله؟ قال: "الحلم والحياء"

   **{ Ashaj binu Cabdiqays wuxuu yiri: Rasuulku wuxuu igu yiri “Waxa aad leedahay labo dabeecadood oo Illaahay jecel yahay, waxaana ku iri waa labadee? Wuxuu igu yiri “waa dulqaadka iyo xishoodka” }**

5. Xishoodku wuxuu qofka u hogaamiyaa janada Illaahay, xishood la’aantuna waxay qofka u hogaamisaa naarta, waa kan nebiga oo inoo sheegaya sidaas:

   قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: "الحياء من الإيمان، والإيمان في الجنَّة، والبذاء من الجفاء، والجفاء في النَّار"

6. Xishoodku waa dhaqanka ugu sareeya uguna faa'iidada badan dhaqamada Islaamka dhammaantood oo wada heer sare ah sida uu ku sheegay Rasuulku xadiiskaan:

قال رسول الله -صلَّى الله عليه وسلَّم-: «إنَّ لكلِّ دينٍ خلقًا وخلق الإسلام الحياء» رواه ابن ماجه

**{Diin kasta waxay leedahay dhaqan u gaar ah, dhaqanka diinta Islaamka u gaarka ahna waa xishoodka}.**

7. Xishoodku waa dhaqan soo jireen ah oo dhammaan diimihii iyo nebiyadii hore u ahaa udub dhexaadka akhlaaqdooda sida uu nebigeenu (NNKH) inoogu sheegay xadiiskaan:

عن أبي مسعود -رضي الله عنه- قال: قال النَّبيُّ -صلَّى الله عليه وسلَّم-: «إنَّ ممَّا أدرك النَّاس من كلام النبُّوَّة الأولى: إذا لم تستح فاصنع ما شئت» رواه البخاري

**{Waxay dadku ka soo gaareen hadaladii nebiyadii hore oraahda ah "hadaadan xishoonayn waxaad doonto samee"}.**

Macnuhu waxa weeye qofka waxa xumaanta ka celiyaahi waa xishoodka haddii la waayana qofka waxaa halaabaya dhaqankiisa wuxuuna u dhaqmayaa sida uu rabo.

## B) Dhibaatooyinka Xishood darada

Xishood daradu waxay keentaa sharaf dhac dhanka bulshada ah, waxaa kale oo ay keentaa in aan Illaahay ka aqbalin qofka acmaasha uu sameeyo oo dhan mar haduusan ka xishoonayn

waxa xun inta ay doonaan ha la ekaadaan acmaashaasu sida Rasuulku (NNKH) uu ku sheegay xadiiskaan:

عن ثوبان -رضي الله عنه-: عن النَّبيِّ -صلَّى الله عليه وسلَّم- أنَّه قال: «لأعلمنَّ أقوامًا من أمَّتي يأتون يوم القيامة بحسنات أمثال جبال تهامة بيضا فيجعلها الله -عزَّ وجلَّ- هباءً منثورًا» قال ثوبان: يا رسول الله صفهم لنا جلهم لنا أن لا نكون منهم ونحن لا نعلم، قال: «أمَّا إنَّهم إخوانكم ومن جلدتكم ويأخذون من الليل كما تأخذون ولكنَّهم أقوام إذا خلوا بمحارم الله انتهكوها» رواه ابن ماجه

**{ Thawbaan wuxuu ka weriyay nebiga (NNKH) inuu yiri: "waxaan ogahay dad ka mid ah umadayda oo maalinta qiyaamaha la imaanaya acmaal wanaagsan oo buuraha le' eg Illaahayna wuxu ka dhigayaa acmaashoodaas sidii fara-cadeeye la afuufay", wuxuu yiri Thawbaan: "noo tilmaan Rasuulkii Illaahayow si aanaan uga mid noqon", nebiguna (NNKH) wuxuu yiri: "waa walaalihiin oo waxay leeyihiin dubkiina oo kale xitaa habeenkii way kacaan sidaad idinkuba u kacdaan, laakiin waxaa dhaqan u ah marka ay cidlada joogaan in ay san ka xishoon xumaanta oo ay sameeyaan" }**

Waxaa kale oo ka mid ah dhibaatooyinka xishood yarida maantana aadka u badatay in dumarkeenii ay ka tageen asturkii

wanaagsanaa ee diinta islaamku caanka ku ahayd, iyagoo u labisanaya qaab diintooda iyo sharftoodaba wax u dhimaysa, nebigeenuna (NNKH) wuxuu sheegay in ay nacladi ku dhacayso naartana ay hoy u noqonayso, janada urkeedana aysan helaynin qof kasta oo dumar ah oo soo baxda iyadoo u labisan hab aan waafaqsanayn shareecada Islaamka siduu Rasuulku ku sheegay xadiiskaan:

عن أبي هريرة رضي الله عنه قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: "صنفان من أهل النار لم أرهما: قوم معهم سياط كأذناب البقر يضربون بها الناس، ونساء كاسيات عاريات، مائلات مميلات، رؤوسهن كأسنمة البخت المائلة، لا يدخلن الجنة ولا يجدن ريحها ".

Ugu dambeyn, xishoodku waa udub dhexaadka dhaqanka, sharafta iyo diinta ummada Soomaaliyeed, waana astaan lagu qaymeeyo qof walba oo bini aadam ah gaar ahaan haweenka, waana xariga isku haya bulshada ee ka ilaaliya isku xadgudubka, cayda iyo ceebta oo dhan, asturnaanta iyo labiskuna waxay astaan u yihiin xishoodka qofka gaar ahaan gabdhaha in ay jirkooda ka asturaan indho kasta oo aan munaasab u ahayn in ay arkaan.

Hadalka hoose iyo hagaagsanaantu waxay tusinaysaa xishoodka iyo xushmada qofkaasi lee yahay. Sidoo kale ixtiraamka dhamaan dadka kale gaar ahaan dadka ka da' weyn waa tilmaan lagu garto qofka xishoodkiisa.

In kastoo xishoodka inta badan laga fiiriyo hablaha hadana waxaa waajib ku ah raga Soomaaliyeed in ay yeeshaan xishood

muujinaya raganimo, geesinimo iyo xaqdhowr. Xishoodka ummada Soomaaliyeed wuxuu si buuxda ula jaanqaadayaa diinta Islaamka taas oo xishoodka ka dhigtay qayb ka mid ah rumeynta Illaahay iyo Rasuulkiisaba.

Diinteenu waxay faraysaa rag iyo dumarba in ay xishoodaan oo hoos u dhigaan daymadooda (indhohooda) ayna xifdiyaan sharfatooda. Iyadoo ay jiraan isbadelo casri ah iyo saamaynta baraha bulshada ee dunida oo dhan, hadana xishoodka ummada Soomaalida wuxu weli yahay qiimo weyn oo laga rabo qofka, qoyska iyo dhammaan qowmiyadeena.

## 9. Amaanada (الأمانة)

Amaanadu waa dhaqan Islaami ah oo aad u qiimo sareeya, waana saldhiga iimaanka qofka muslimka ah, waana tiir muhiim ah oo dhisaya qofka shakhsiyadiisa. Macnaheeduna waa: gudashada wax kasta oo qofka xaq loogu leeyahay in uu guto sida xuquuqda Illaahay iyo xuquuqda aadanaha, xifdiyana waxa lagu aamino qofka xoolo iyo xog ba iyo kasoo bixida masuuliyada qofka saran si dhammaystiran oo daacad ah.

Amaanadu waa dalad ay hoos timaado xiriirka Allaah iyo adoonkiisa ka dhaxeeya iyo xiriirada bulshada dhexdooda ah.

## A) Qaybaha Amaanada

**Amaanada diinta:** Amaanadu waxay gashaa dhammaan qaybaha nolosha, waxaana ugu muhiimsan amaanada diinta sida salaada, soonka, sekada, nadaafada, iyo dhammaan wax kasta oo ku saabsan diinta Illaahay

**Amaanada hantida iyo wax isu-dhiibashada:** Sida in la xifdiyo wax kasta oo la isku dhiibto ama si un qofka gacantiisa ku soo gala.

**Amaanada xubnaha qofka:** Xubnuhu waa nimco uu Allaah qofka bini aadamka ah siiyay si bilaash ah oo wax hanti ah aan laga qaadin qofka lagagana rabin isticmaalkooda wax khidmad ama kiro ah, keliya qofka waxaa laga rabaa in uu ilaashado xubnihiisaas Illaahay uu ku manaystay oo wixii dhib ku ah uu ka daayo waana amaano uu Illaahay ku aaminay qofka bini aadamka ah, indhihiisa qofku inuu ku fiirsado wax aan wax u dhimaynin ee wax u taraya dhegihiisana uu ku dhageysto wax waxtar u leh, carabkana uu ugu hadlo si isaga anfacaysa umadana aan wax u dhimaynin, gacmihiisana uu wax kasta ku qabsado isagoo aan ku dhibaynin naftiisa iyo dadka kale midna, lugihiisana uu ku aado meeshii uu rabo haddii aysan ahayn meel dhibaato ugu jirto naftiisa ama umadiisa. Dhamaan qofka xubnihiisu waa amaano Illaahay u dhiibtay lagana rabo inuu ka ilaaliyo wixii Illaahay ka reebay.

**Amaanada siraha:** Sirtu waa wax qofi adiga keliya kugu aaminay oo uu san cid kale u ogolaan ogaanshaheeda sidaas darted akhlaaq ma aha inaad bixiso wixii qofi kugu aaminay. Siraha waxaa ugu weyn oo ugu muhiimsan in la ilaaaliyo mida gurigaaga iyo qoyskaaga dhexdooda ah, waana damiir xumo in qofku cid kale uga sheekeeyo waxa gurigiisa dhexdiisa ka dhacaya ama ku saabsan xaaskiisa, ilmihiisa iwm.

**Amaanada masuuliyda iyo shaqada:** masuuliyada iyo shaqadu waa amaano saaran qofka shaqaalaha ah ama masuulka ah oo laga rabo in uu ka soo baxo una guto si dhammaystiran oo aan lahayn wax hagrasho ah haddii kale qofkaasi wuxuu noqonayaa khaa’in.

**Amaanada cilmiga iyo nasteexaynta:** cilmiga iyo nasteexada oo loo gudbiyo cida mudan waa waajib saaran qofka leh tilmaamahaan, waana amaano laga rabo inuu u guto si dhamaystiran, ka qarinta cilmiga laga qariyo cid u baahan waa khiyaano uu qofku ku sameeyay aqoontii uu Allaah siiyay, si la mid ah ka hagrashada qof u baahan la talin wanaagsan ayana waa khiyaano.

Allaah wuxuu na amray waajibna ka dhigay gudashada amaanada siduu Allaah kitaabkiisa ku yiri:

﴿ ۞ إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَن تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَىٰ أَهْلِهَا وَإِذَا حَكَمْتُم بَيْنَ النَّاسِ أَن تَحْكُمُوا بِالْعَدْلِ ۚ إِنَّ اللَّهَ نِعِمَّا يَعِظُكُم بِهِ ۗ إِنَّ اللَّهَ كَانَ سَمِيعًا بَصِيرًا﴾ سورة النساء:58

Wuxuu kale oo Illaahay mamnuuc ka dhigay khayaanada sida uu inoogu sheegay qur’aankiisa kariimka ah:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَخُونُوا اللَّهَ وَالرَّسُولَ وَتَخُونُوا أَمَانَاتِكُمْ وَأَنتُمْ تَعْلَمُونَ﴾ الأنفال:27

Wuxuuna Illaahay aad u wayneeyay culeyska ay amaanadu leedahay ilaa uu sheegay Illaahay inay qaadi kari waayeen cirarka iyo dhulalka aadamuhuna uu qaaday sida Illaahay ku sheegay kitaabkiisa kariimka ah:

﴿ إِنَّا عَرَضْنَا الْأَمَانَةَ عَلَى السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَالْجِبَالِ فَأَبَيْنَ أَن يَحْمِلْنَهَا وَأَشْفَقْنَ مِنْهَا وَحَمَلَهَا الْإِنسَانُ ۖ إِنَّهُ كَانَ ظَلُومًا جَهُولًا﴾ الأحزاب:72

Si la mid ah Rasuulku wuxuu sheegay in qofka aan amaanada lahayn uusan iimaan ba lahayn sida uu ku yiri xadiithkaan:

"لا إيمانَ لمن لا أمانةَ له، ولا دينَ لمن لا عهدَ له".

**{Iimaan ma leh qofkii aan amaano lahayn, diina ma laha qofkii aan balan lahayn}.**

Calaamadaha munaafaqa ayuu nebigu ( NNKH) ku daray khiyaanada iyo amaano la'aanta sida uu ku yiri xadiisakaan:

" آيَةُ المُنَافِقِ ثَلَاثٌ: إِذَا حَدَّثَ كَذَبَ، وَإِذَا وَعَدَ أَخْلَفَ، وَإِذَا اؤْتُمِنَ خَانَ "

**{Astaanta qofka munaafaqa ahi waa saddex; markuu sheekaynayo been ayuu sheegaa, hadduu balan qaadana wuu ka baxaa, haddii la aaminana wuu khiyaanaa}.**

Ilaa heer uu nebigu gaarsiiyay inuu yiri Illaahay ayaa la doodaya oo wajahaya qof kasta oo khiyaaneeya cid kale oo aamintay sida ku sugan xadiisul qudsigaan:

عن أبي هريرة رضي الله عنه، عن النبي ﷺ قال:قال الله تعالى: (ثَلاثَةٌ أَنَا خَصْمُهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ: رَجُلٌ أَعْطَى بِي ثُمَّ غَدَرَ، وَرَجُلٌ بَاعَ حُرًّا فَأَكَلَ ثَمَنَهُ، وَرَجُلٌ اسْتَأْجَرَ أَجِيرًا فَاسْتَوْفَى مِنْهُ وَلَمْ يُعْطِهِ أَجْرَهُ )

**{Illaahay wuxuu yiri " saddex aniga ayaa la doodaya maalinta qiyaame; qof aniga dartay lagu aaminay oo khiyaameeyay, qof iibsaday qof xor ah oo lacagtiisa cunay iyo qof kireystay shaqaale shaqadiina uu u qabtay oo aanan siinin wixii uu ku kireystay"}.**

Dhibaatada iyo khatarta ay khiyaanadu leedahay darteed ayuu Rasuulku ka magan galay Illaahay, waxaana ka mid ahaa ducooyinkiisii:

**"اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الجُوعِ، فَإِنَّهُ بِئْسَ الضَّجِيعُ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنَ الخِيَانَةِ، فَإِنَّهَا بِئْسَتِ البِطَانَةُ"**

**{Illaahow waxaan kaa magan galay gaajada, maxaa yeelay waa la jiife kan ugu xun, waxaa kale oo aan kaa magan galay khiyaanada maxaa yeelay waa saaxiib kan ugu xun}.**

## B: Faa'iidooyinka amaanada u leedahay qofka iyo qaranka

Amaandu waa rukni muhiim ah oo dhisaya shakhsiyada qofka iyo horumarka qaranka, waana mid ka mid ah sifooyinkii ugu waa weynaa ee nebi Muxamed(NNKH) lagu yaqaanay xitaa

nebinimada ka hor, waxa ayna leedahay amaanadu faa'iidooyin badan oo qofeed iyo kuwo bulshaba. Waxaan ka xusidoonaa kuwa ugu waaweyn.

**Qofka:**

- Helitaanka raali ahaanshaha Illaahay: qofka amaanada ilaaliya wuxuu helayaa jacaylka iyo ka raali ahaanshaha dhabta ah ee Illaahay iyo Rasuulkiisa.
- Kalsoonida bulshada: qofka aaminka ah wuxuu ku dhex yeelanayaa bulshada dhexdeeda sumcad wanaagsan waxaana ku aaminaya hantidiisa iyo sirihiisa qof kasta oo bulshada ka mid ah.
- Xasilooni maskaxeed: qofka aaminka ah wuxuu ku noolaadaa nabad gelyo gudaha ah iyo deganaansho qalbiga ah, waayo kama baqayo in la fashiliyo ama la qabto isagoo wax khiyaanaya.
- Barakada arsaaqda: amaanadu waxa ay keentaa in hatida iyo shaqada qofku ay noqdaan kuwo barakaysan oo uu guul kaga gaaro noloshiisa.
- Badbaadada aakhiro: Qofka aaminka ah wuxuu ka badbadayaa ciqaabta adag ee loo balan qaaday kuwa khiyaanada sameeya maaalinta aakhiro.

**Qaranka:**

- Yaraynta musuq-maasuqa: haddii madaxda iyo shaqaalaha qaranku ay yihiin kuwo aamin ah waxaa dabar go'aya

musuq-maasuqa taas oo keenaysa in hantida dadweynaha si sax ah loo maareeyo laguna bixiyo meelihii ku haboonaa.

- Adkaynta cadaalada: amaanadu waxa ay keentaa in garsoorlu noqdo mid cadaalad ah, qof kastana uu helayo xuquuqda uu leeyahay iyada oo aan cidna laga eexan.
- Hormarinta dhaqaalaha: Maalgashedayaasha shisheeyah iyo kuwa guduhuba waxa ay ku dhiiranayaan in ay lacagtooda gashadaan marka ay wadanka ka jirto aaminnimo iyo sharci la isku halayn karo.
- Wadajirka iyo amniga: bulsho kasta oo ay ku badan tahay amaanadu waxaa ka yaraada dembiyada waxaan xoogaysta isku duubnida iyo nabadgelyada guud ee dalka.
- Kalsoonida dowladnimada: marka ay amaano ka dhex jirto gudaha dowlada shacabku wuxuu si buuxda u aaminayaa haayadaha dowlada taas oo fududaynaysa in si wadajir ah looga shaqeeya danta guud iyo difaaca dalka.

Hadaba, ma la dhihi karaa amaanadu waa furaha koowaad ee horumarka qaran kasta gaar ahaan qarankeenaan jilicsan oo maanta aadka ugu baahan hogaamiyeyaal aamin ah.

## C: Dhibaatooyinka khiyaanadu u leedahay qofka iyo qaranka

Khiyaanada ama wax isdabamarintu waa aafo weyn oo buruburisa nolosha qofka meeshana ka saarta jiritaanka iyo horumarka qaran

kasta, waana sifada ugu weyn ee lagu garto munafaqiinta sidii aan kusoo marnay xadiiskii Rasuulka (SCW) oo ahaa:

قال ﷺ: "آيَةُ المُنَافِقِ ثَلَاثٌ: إِذَا حَدَّثَ كَذَبَ، وَإِذَا وَعَدَ أَخْلَفَ، وَإِذَا اؤْتُمِنَ خَانَ"

Waxayna leedahay khiyaanadu dhibaatooyin aad u baaxad weyn, kuwo qofeed iyo kuwo qaran ba.

**Qofka:**

- ✓Carada Illahay: qofka khiyaanada sameeyaa wuxuu muteysanayaa carada Illahay iyo ciqaab adag maalinta qiyaame.
- ✓Sumcad beel: qof kasta oo khiyaanada ku caan baxa wuxuu lumiyaa kalsoonida iyo ixtiraamka bulshadiisu u hayso.
- ✓Nusqaanta iimaankiisa: nebi Muxamed (NNKH) wuxuu sheegay in qofka khiyaanada sameeya uu san lahayn iimaan dhammeystiran sida uu ku yiri xadiiskii aan soo marnay:
  **" لا إيمان لمن لا أمانة له، ولا دين لمن لا عهد له "**
- ✓Barako la’aan: hantida ama xilka lagu helo khiyaanada waxa ay noqdaan kuwo barako la’aan ah, waxa ayna qofka u horseedaan burbur maaliyadeed mid nafsadeed iyo mid diimeed.
- ✓Shalayto iyo walbahaar: qofka khiyaanoolaha ah wuxuu had iyo jeer ku nool yahay cabsi uu ka qabo mar uun in la fashilo wuxuuna dareemayaa markasta ciriiri dhanka nafta ah.

**Qaranka:**

- ✓ Burburka dhaqaalaha: khiyaanada iyo musuq-maasuqa iyo xatooyada hantida dadweynahuhu waxa ay curyaamiyaan dhaqaalaha dalka, waxa ayna sababaan saboolnimo iyo adeeg la'aanta bulshada.
- ✓ Lumitaanka cadaalada: marka khiyaanada iyo musuq-maasuqu ay galaan garsoorka iyo sharciga dalka waxaa lumaya xaqa qofka muwaadinka ah u leeyahay inuu helo cadaalad, waxaana meesha ka baxaysa kala dambaynta.
- ✓ Amnidaro iyo dambiyo: khiyaanada iyo musuq-maasuqu waxa ay dhalaan amni daro dhexmarta shacabka iyo dowladabada taas oo horseeda in ay dambiyadu bataan nabadgelyaduna faraha ka baxdo.
- ✓ Cabsida maalgashadayaasha: shirkadaha caalamiga ah iyo kuwa dalkuba wax ay ka cararaan wadankii laga waayo amaano oo uu kubato musuq-masuqu, taas oo joojisa fursadaha shaqo ee ay heli lahaayeen bulshadu gaar ahaan dhalinyarada.
- ✓ Burburka haayadaha dowladnimo: qaran kasta oo ay ragaadiyeen khiyaanada iyo musuq-maasuqu ma yeesho haayado dowladeed oo sal adag oo u adeegi kara bulshada dalkaas, waxaana ku yaraada bulshadaas wadinayda iyo iskuduubnida.

Khiyaanadu waa cudur dilaa ah haddii aan laga hortagingna keeni kara in qaranku dumo, dadkiisuna ay ku noolaadaan dhibaato joogto ah sida dalkeena Soomaaliya manta ka jirta.

Ugu dambay, daweynta cudurka khiyaanada ee aafeeyay bulshada soomaaliyeed waxay u baahan tahay isbadel dhab ah oo ka bilowda qofka Soomaaliga ah ilaa heerka ugu sareeya ee qaranka, maxaa yeelay khiyaanadu maahan mid lagu dhashay ee waa dhaqan xun oo lala qabsaday, waxaana lagu daweyn karaa tilaabooyinkaan soo socda:

1. Soo nooleynta akhlaaqda Islaamka iyo cabsida Illaahay:
    - Barashada diinta Islaamka: in xooga la saaro barashada iyo ku dhaqanka qiyamka diinteena Islaamka ee adkaynaysa amaanada laguna dhiirigeliyo bulshada in khiyaanadu ay tahay calaamad munaafaqnimo.
    - Wacyigelin diini ah: waa in culimada iyo aqoonyahanka Soomaaliyeed ay si joogto ah uga hadlaan dhibaatada khiyanada iyo musuq-maasuqu uu ku leeyahay nolosha bulshada Soomaalieed iyo ciqaabta ku dhacaysa qofka khaa'inka ah adduun iyo aakhiraba,
2. Adkaynta sharciga iyo la dagaalanka musuq-maasuqa
    - Cadaalad loo siman yahay: waa in la helo garsoor madax banaan oo ciqaaba qof kasta oo ku kaca khiyaano ama xatooyo qaran, iyadoo aan loo eegayn qabiilkiisa iyo xilkiisa.
    - Isla xisaabtan dhab ah: in la sameeyo haayado xoogan oo baara dakhliga iyo hantida ay leeyihii dadka qabanaya xilalka dowlada ama dadweynaha (Hanti-dhowre dhab ah).

3. Waxbarsahda iyo barbaarinta jiilka cusub.
    - In manhajka waxbarshada dalka (Dugsiyada iyo Jaamacadaha) lagu daro maadooyin si gaar ah u baraya ardayga Soomaaliyeed muhiimada wadaniyada, daacadnimada iyo ilaalinta amaanadu ay leedahay.
    - Waa in qoyska Soomaaliyeed ay ubadkooda ku barbaariyaan cuno xalaal ah kuna dhiirigeliyaan oo baraan in guushu ku timaado dedaal iyo daacadnimo iyo jacaylka wadankooda ee aysan ku imaanin khiyaano, musuq-maasuq iyo xatooyada xoolaha ummadooda.
4. Cirib tirka qabyaalada
    - In la joojiyo dhaqanka ah waa wiilkayagii marka qof qabiilka kamid ah uu ku kaco khiyaano ama xatooyo hanti dadweyne. Qofka khaa'inu wadanka ah waa in loo arkaaa dambiile qaran ee aan loo arkin qof reer hebel ah.
5. Hormarinta dhaqaalaha iyo bixinta xuquuqda shaqaalaha.
    - Waa in shaqaalaha dowlada iyo kuwa gaarka ahba la siiyo mushaar ku filan noloshooda si looga fogeeyo in ay u baahdaan khiyaano ama laaluush iyo musuq-maasuq.
    - Waa in la buuro fursado shaqo oo loo siman yahay lana yareeyo eexda iyo garab marida sharciga Islaamka.

Shantaas qodob iyo in kale oo badan oo aanan sheegin waxa ay ka qayb qaadan karaan yaraynta khiyaanada iyo musuq-maasuqa dalkeena ragaadiyay, Allaah na ha inaga saaro.

## 10: Oofinta Balamaha (الوفاء بالعهد)

Fulinta balantu waa mid ka mid ah dabeecadaha ugu wanaagsan ee uu yeesho qofku, waana tiir muhiim ah oo dhisaya akhlaaqda, kalsoonida, iyo ixtiraamka bulshada dhexdeeda ah. Islaamkuna wuxuu si weyn u adkeeyay in la fuliyo balamaha, wuxuuna ka dhigay mid ka mid ah astaamaha lagu garto mu'miniinta dhabta ah sida Illaahay ku sheegay kitaabkiisa:

﴿وَالَّذِينَ هُمْ لِأَمَانَاتِهِمْ وَعَهْدِهِمْ رَاعُونَ﴾ المؤمنون:08

Wuxuu kale oo Illaahay ku sheegay qur'aanka kariimka ah in balantu ay tahay wax la is weydiinayo adduun iyo aakhiraba, wuxuuna yiri Alle weyne:

﴿وَأَوْفُوا بِالْعَهْدِ إِنَّ الْعَهْدَ كَانَ مَسْئُولًا﴾ الإسراء: 34

Allaah wuxuu ku matalay dadka ka baxa balanka sidii qof doqon ah oo kale oo maalinkaas oo dhan shaqo qabanayay, markii ay xoog iyo xoolaba kaga dhammaadeena, habeenkii dib u burburiyay wixii uu soo qabtay manta, wuxuuna yiri Allaah (SWT):

" وَلَا تَكُونُوا كَالَّتِي نَقَضَتْ غَزْلَهَا مِنْ بَعْدِ قُوَّةٍ أَنْكَاثًا" الإسراء:92

Oofinta balanta waxaa lagu helaa jacaylka Illaahay sida Illaahay uu qur'aanka ku sheegay:

﴿بَلَى مَنْ أَوْفَى بِعَهْدِهِ وَاتَّقَى فَإِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَّقِينَ﴾ آل عمران: 76

Nebigeena (NNKH) wuxuu sheegay in qofka marka uu balan qaado ka baxa oo aan oofin uu leeyahay dabeecad kamid ah dabeecadaha munaafaqiinta siduu ku sheegay Rasuulku xadiiskaan:

قال رسول الله ﷺ: (آيةُ المنافقِ ثلاثٌ: إذا حدَّث كذَب، وإذا وعَد أخلَف، وإذا اؤتُمِن خان) متفق عليه

Wuxuu kale oo sheegay Rasuulku (NNKH) in qofka balan ka baxa yaqaana uu san wax diin ah lahayn siduu ku sheegay xadiiskii aynu horay usoo marnay:

قال رسول الله ﷺ: (لا إيمانَ لِمَن لا أمانةَ له، ولا دِينَ لِمَن لا عهدَ له) [رواه أحمد

**{Wuxuu yiri Rasuulkii Illaahay: "Iimaan malaha qofkii aan amaano lahayn, diina ma laha qofkii aan balan lahayn"}**

Qofka aan balanta oofin ee qawl-laawaha ah waxaa loo taagayaa maalinta qiyaamaha calan dheer oo ay ku qoran tahay calanka dhagar lawga si loogu garto qof walba oo balanta ka bixi jiray sida uu Xabiibku ku sheegay xadiiskaan:

قال رسول الله ﷺ: (لِكُلِّ غَادِرٍ لِوَاءٌ يَوْمَ الْقِيَامَةِ، يُرْفَعُ لَهُ بِقَدْرِ غَدْرِهِ) [رواه مسلم

**{Rasuulka Illaahay wuxuu yiri: "mid kasta oo dhagarlow ah oo balanta ka baxa waxaa loo taagayaa calan (astaan lagu garto) maalinta qiyaamaha, calankaas oo dherer le'eg qofba inta dhagartiisu ahayd"}.**

## A: Faa'iidooyinka Balan Oofinta

Oofinta balantu waxa ay saldhig u tahay dhismaha bulsho toosan iyo dowladnimo xoogan, waxa ayna u leedahay faa'iido weyn qofka iyo qarankaba. Waxaa ka mid ah faa'iidooyinkeeda qof ahaaneed:

- In qofka balanta ilaaliya uu kasbanayo kalsoonida iyo ixtiraamka bulshada ku xeeran.
- Qofka balanta ilaaliya waxaa u dhamaystirmaya iimaankiisa iyo diintiisa sida uu Rasuulku ku sheegay xadiiskii aan horay usoo qaadanay.
- Balan ilaaalintu waxa ay fure u tahay guusha qofka waxayna dhistaa xiriirka wanaagsan ee qofku uu la lee yahay bulshadiisa waana jidka loo maro kalsooni iyo saaxibtinimo waarta.

Waxaa kale oo balan oofintu ay faa'iido u leedahay bulshada iyo dowladnimadaba, waxaana ka mid ah faa'dooyinkeeda:

- Waxa ay xoojisaa isku xirnaanta shacabka iyo is-jacaylkooda, iyada oo yaraynaysa kala shakiga iyo is-khilaafka bulshada dhexdeeda ah.
- Marka madaxda dalku ay oofiyaan balamihii ay u qaadeen shacabka xilligii ololaha doorashada shacabku wuxuu aaminayaa nidaamka dowladnimada, waxaana kor u kacaya wadaniyadooda iyo dal jacaylkooda.
- Oofinta balmaha siyaasadeed iyo waxa la isku ogyahay waxa ay ka hortagtaan fowdada, firaaqa dowliga ah iyo dagaalada sokeeye.

## B: Dhibaatooyinka Balan ka baxa

Balan ka baxu waa mid ka mid ah dhibaatooyinka ugu waaweyn ee burburiya xiriirka dadka iyo dhismaha dowladnimada, waxaana ka dhasha kalsooni daro baahsan, wuxuuna curyaamiyaa balan ka baxu horumarka qof kasta oo qawl-laawe ah iyo qaran kasta oo madaxdiisu ay bilaa qawl yihiin. Waxaa kam mid ah dhibaatooyinka balan ka baxa:

- ✓ Kalssooni daro: qofka balanta ka baxa wuxuu luminayaa kalsoonida iyo ixtiraamka ay u hayaan bulshadu, saaxiibadiis iyo xitaa qoyskiisa.
- ✓ Go’doominta bulshada: dadku waxa ay ka fogaadaan qofka qawl-laawaha ah oo aan hadalkiisa la aamini Karin taas oo u keenta qofkaas in laga dhex naco bulshada qaybaheeda kala

duwan uuna waayo xiriirada wax ku oolka u ah noloshiisa ee uu la samayn lahaa dadkiisa.

- ✓ Cadaabta Illaahay: diinta Islaamku waxay si adag uga digtay balan ka baxa waxa ayna cadaysay in qofka balanka ka baxa uu mutaysanayo carada Illaahay.
- ✓ Burburka dowladnimada: marka ay madaxda qaranku ka baxaan balamihii ay shacabka ka qaadeen iyo heshiisyadii ay la galeen dadka kale waxaa meesha ka baxaya aaminaadii dowladnimada waxaana ka dhalanaya fowdo siyaasadeed.

Ugu dambayn, xalka ugu dambeeya ee dhibaatada balan ka baxa ee ragaadisay ummada Soomaaliyeed wuxuu ku jiraa isbadel dhab ah oo laga sameeyo ku dhaqanka diinta Islaamka iyo waxbarasho tayo leh, sida; in si joogta ah bulshada loogu baraarujiyo in oofinta balantu ay tahay qayb kamid ah iimaanka, balan ka buxuna uu yahay dambi weyn iyo calaamad munaafaqnimo. Waxaa kale oo xal u ah balan ka baxa hogaamin suuban oo ku dayasho mudan sida in culumada, aqoon yahanka iyo waalidiintu ay noqdaan kuwo ficil ahaan u muujiya oofinta balanta si jiilka cusubi ay ugu daydaan.

Si dhalaanka iyo dhalinyaradu ay ugu raboobaan balan oofinta waa in lagu daro waxbarshada dalka muhiimada ay u leedahay qofka inuu ka soo baxo balamihiisa si uu u noqdo qof wax tar u leh naftiisa iyo bulshadiisaba.

# Gunaanad (الخاتمة)

Bulshadii reer Madiina markii ay barteen lana qabsadeen kuna dhaqmeen dhammaan dhaqamadaan wanaagsan ee Islaamiga ah uuna la yimid nebi Muxamed(NNKH) iyo kuwo kale oo aad u badan oo aan buugaan kooban lagu dhammeystiri Karin, waxay noqdeen dadkii reer Madiina dad ka dhisan dhan kasta oo nolosha bini aadamka ah. U dhisan qof ahaan, qoys ahaan, bulsho ahaan iyo dowlad ahaan ba. Taas ayaana sababtay in ay ka sameeyaan hormar baaxad leh dhammaan qaybaha nolosha adduunka iyo u diyaar garowga aakhiro. Waxa ayna noqdeen dadkii muslimiinta ahaa oo ay xarunta u ahayd magaalada Madiina xadaarad weyn oo caalamka ku soo biirtay, dunida oo dhana ay isha ku hayso mudo kooban oo aan ka badnayn 10 sano.

Waxaa jirta oraah caan baxday oo uu yiri aqoonyahankii weynaa ee muslimka ahaa ee cilmiga bulshada dhidibada u aasay oo magaciisa la oran jiray **Ibnu Khalduum** oraahdaas oo ahayd:

"الإنسان مدني بطبيعته"

**{Bini aadamku iskiis ayuu bulshaawi u yahay}.**

Maadaam bini aadamku uusan kala maarmayn oo uu yahay bulsho wada nool, bulshadaas ayuu Illaahay u soo diray dhammaan nebiyadii Illaahay oo uu ka mid ahaa nebigeena

Muxamed ah (NNKH) oo raxmad u ahaa bulshada caalamka oo dhan sida Illaahay kitaabkiisa ku sheeegay:

﴿ وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا رَحْمَةً لِّلْعَالَمِينَ﴾ سورة الأنبياء: 107

Aqoon yahanada qaarkood oo aan diinta Islaamka si fiican u baran una fahmin waxa ay u moodayaan in cilmiga lagu dhiso bulshooyinka iyo xadaaradaha oo ah cilmiga bulshada uu yahay mid cusub oo ay la yimaadeen reer galbeedku, waana faham daro ka haysata diinta Islaamka iyo dhaqankii suubanaa ee Rasuulkeena Muxamed ah.

Soo bandhigidii koobnayd ee aan ku samaynay dhismihii uu nebigu (NNKH) ka dhisay bulshada ku nooleyd magaalada Madiina wax kasta oo noloshooda taabanaya waxa ay markhaati u tahay sida cilmiga bulshadu iyo dhisida xadaaradaha togan ay u yihiin aqoon nebawi ah oo nebigeena suuban uu ka hirgaliyay bulshadii reer Madiina dhexdooda, ilaa ay ka noqdeen bulshada ugu sareysa caalamka oo dhan xilligoodii iyo manta oo la joogaba, marka laga fiirsho qaabkii ay u noolaayeen oo ka dhisnaa dhan kasta oo nolosha bini aadamka qusaysa adduun iyo aakhiraba.

Noloshii Rasuulkuna waxay ahayd dhammaanteed dedaal iyo halgan uu ugu jiray hormarinta iyo ka dhigida bulshadiisa bulsho nabad ah, sharf leh oo ku nool deegan iyo dal horumarsan. Magacii Al Madiina (Magaaladii ilbaxnimada) ee uu u bixiyay nebigu magaalada Madiina oo horay loo oran jiray Yathriba

(Magaalo baas), waxay astaan muuqata u tahay sida nebigu ugu dedaalayay dad iyo dalba in ay horumaraan. Sidoo kale heshiisyadii Madiina ee lagu ilaalinayay dhammaan xuquuqda dadkii deganaa magaalada Madiina waxay ina bareen in nebigeenu (NNKH) uu hormuud u ahaa ilaalinta xuquuqda aadanaha  gaar ahaan kuwa laga tirade badan yahay iyo wada noolaanshaha bulshooyinka kala duwan oo xitaa kala diinta ah.

Kobcintii bulshada reer Madiina dhanka kordhinta dadka degan magaalada, aqoontooda, caafimaadkooda, waxbarashadooda, dhaqaalahooda iyo maamulkoodaba, wuxuu ahaa cashar weyn oo ina baray in cilmiga hormarinta bulshooyinku uu yahay aqoon Islaami ah oo uu aasaasay salkana u dhigay nebi Muxamed (NNKH).

Isku dubaridkii nidaam dowladeed oo cadaaaldu tiir dhexaad u tahay kana fog qabyaalad, eex, kooxaysi, iyo musuq-maasuq wuxuu tusaale cad u yahay in la heli karo nidaam dowladeed oo casri ah oo waafaqsan shareecada Islaamka.

Fiiro Gaar ah: Waxaa waajib ka saran yahay aqoon yahanka diinta Islaamka gaar ahaan culumada siirada nebiga dhigta in ay u baraan bulshada muslimiinta ah diintooda iyo habdhaqankii nebigooda qaab uu ku  dhammeystiran yahay hab-nololeedkii nebi Muxamed (NNKH) iyo hormarintiisii bulshada ee dhan kasta ahayd, qaabkaas oo taabanaya waxna ka badelaya horumarinayana nolosha qofka muslimka ah, haday tahay

hagaajinta nolosha adduunka iyo u diyaar garowga aakhiro, oo aan lagu soo gaabsan oo keli ah qayb ka mid ah siirada nebiga oo ka hadlaysa dagaaldii Badar, Uxud iyo wixii la hal maala, oo aan dadku si toos ah uga fahmaynin wax taabanaya noloshooda maalin laha ah.

**Illaahay Nebigeena Naxariis Iyo Nabadgelyo Waarta Korkiisa Ha Yeelo Inagana Ha Inaga Yeelo Kuwa Rumeeya Oo Raaca Dhaqamadiisii Wanaagsanaa Ee Uu Ku Soo Kordhiyay Adduunkaan.**

**وبالله التوفيق**